






Dad Dhiiran
Cunto Diiran

# XEERKA HABDHAQANKA GANACSI EE ANSHAXA LEH



## U SAMEYNTA WAXA SAXDA AH SIDA SAXDA AH







# JADWALKA TUSMADA


Fariin ka socoto Sarkaalkeena Madaxa Fulinta (CEO) .......... 1

Muujinta Daacadnimo .......... 2

- Baro Xeerkayaga .......... 2
  - Sida Loo Isticmaalo Xeerkayaga .......... 2
  - Cidda ay Qasab ku Tahay Inay Raacdo Xeerkayaga .......... 2
  - Ka-tanaasulaadyada iyo Ka-reebitaannada .......... 2
- Faham Waxa lagaa Filayo .......... 3
  - Mas'uuliyadaha Aan Dhammaanteen Wadaagno .......... 3
  - Mas'uuliyadaha Dheeraadka ah ee Maareeyayaasha .......... 3
  - La-xisaabtanka iyo Edebta .......... 4
  - Samaynta Xulashooyin Anshaxeed .......... 4
  - Hadal .......... 5

U-heelanaantayada in Badqabka la Siiyo Muudnaanta Koowaad .......... 6

- Ilaalinta Badqabka iyo Caafimaadka Xubnaha Kooxda .......... 6
- Ilaalinta Badqabka iyo Tayada Cuntada .......... 7
- Joogtaynta Hababka Maareynta Xayawaanka ee Badqabka ah .......... 8

U-heelanaantayada Is-ixtiraamka .......... 9

- Qiimaynta ka mid noqoshada, U Dhanaanta, Kala-duwanaanshaha iyo U-dhaqanka Si Cadaalad ah .......... 9
- Xoojinta Goob Shaqo oo Ixtiraam leh .......... 10
- Ilaalinta Asturnaanta Shaqsiyeed .......... 12

U-heelanaantayada ku aaddan Inaan Macaamiisha iyo Shuraakada Ganacsiga Ula Macaamilno si Cadaalad ah .......... 13

- Ilaalinta Tartan Xor ah oo Cadaalad Ku Dhisan .......... 13
- Iskaashi la Yeelashada Kooxaha Anshaxeed ee Kale .......... 14
- Uruurinta iyo Ilaalinta Macluumaadka Dhinacyada Saddexaad .......... 15
- U Horumarinta Baddeecadahayaga Si Daacadnimo Leh .......... 15
- Ka fogaanshaha Iska Hor Imaadka Danaha .......... 16
- Bixinta iyo Qaadashada Hadiyadaha iyo Ixsaan-falyada .......... 18

U-heelanaantayada Inaan Ilaalino Shirkaddayada .......... 20

- Dhawrista Daacadnimadayada Maaliyadeed .......... 20
- Maareynta Buugaagtayada iyo Diiwaanadayada .......... 21
- Ilaalinta Hantida Shirkadda .......... 22
- Ilaalinta Macluumaadka Shirkadda ee Qarsoodiga ah .......... 23
- Si Sharci ah Uga Ganacsiga Saamiyada iyo Maalgashiga Saamiyada Kale .......... 24
- Ka Taxadarida Wada-xiriirka .......... 25

U-heelanaantayada Muwaadinnimada Shirkadeed ee Mas'uulka ah .......... 26

- Kaqaybgalka Ganacsiga Caalamiga ah .......... 26
- Diidida Musuqmaasuqa iyo Laaluushka .......... 27
- Aqbalida Mas'uuliyadda Bay'adeed .......... 29
- Difaacida Xuquuqda Aadanaha .......... 30
- Ka Hawlgalka Hawlaha Siyaasadeed .......... 31
- U Adeegida Bulshooyinkayaga .......... 32

Sookoobista Dhigaalada .......... 33

# FARRIIN KA SOCOTA SARKAALKAYAGA MADAXA FULINTA



## Ku socota kooxdayada dhiiran,

Haddii aan nahay Hormel Foods, waxaan si weyn uga taxadarnaa inaan gaarno go'aanno wanaagsan, si xushmad leh ula dhaqanno dadka iyo inaan xaqiijino inaan ciyaareyno doorkayaga si aan u dhowrno miqyaasyada aadka u sarreeya ee ina gaarsiiyay guusha 130-kii sano ee la soo dhaafay ilaa iyo hadda.

Waxaa dhammaan hawlgalladayada caalamiga ah ka jiro u-heelanaan ah inaan mar walba ku shaqeyno mabaadi'da ganacsi ee leh anshaxa iyo miqyaasyada ugu sarreeya. Haddii ay tahay inaan waxa saxda ah ka sameyneyno halka aan joogno ama daafaha dunida, waxaa la naagu yaqaanaa daacadnimadayada aan kala go'a lahayn iyo habkayaga aan caadiga ahayn ee ku aadan ahaanshaha shirkad muwaadineed oo heer sare ah.

Xeerkayaga Anshaxa ayaa ah kuwo dhaafsan hadal kaliya. Waa wadarta ficillada aan maalin walba sameyno si aan ugu hoggaansano sharciyada la dabaqi karo, aan si ma'suuliyad leh uga shaqayna shirkadayada, aan ugu dhaqano sidii shirkad muwaadineed oo wanaagsan, aan u ilaalinno dadkayaga, badeecadahayaga iyo macluumaadkayaga, iyo si aan u hagno sida aan ula shaqeyno dadka kale, oo ay ku jiraan shuraakadayada, alaab-qeybiyeyaasha, iibiyeyaasha, macaamiisha iyo iibsatada.

Raacida Xeerkayaga waa mas'uuliyad weyn; taasoo ay soo dhaweeyeen kooxdayada ka kooban 20,000 oo qof oo dhiiran.

Asal ahaan, waxay ku saabsan tahay kalsooni. Kalsoonida dadka kale ay inagu qabaan iyo kalsoonida aan inaga dhexdeena isku qabno. Waxaan kalsoonida ugu sareysa ku qabaa in kooxdan ay sameeynayaan waxa saxda ah mar walba si midba midka kale u ilaaliyo iyo si loo ilaaliyo Hormel Foods.

Fadlan wakhti geli inaad fahamto Xeerkan Anshaxa oo si joogto ah u tixraac sanadka oo dhan. Baro mabaadii'da iyo siyaasadaha qeexaya sida aan ganacsiga u samayno oo xaqiiji in ficilladaada iyo go'aanadaada maalinlaha ah ay si fiican uga turjumayaan fikradaha iyo caqiidooyinka dhaqameed ee Hormel Foods.

Waad ku mahadsan tahay wax kasta oo aad u samayso inaad naga caawiso inaan ilaalino oo aan kor u qaadno sumcaddayada ah inaanu nahay mid ka mid ah shirkadaha cuntada ee ugu sumadda wanaagsan adduunka.

**Jim Snee**

Guddoomiyaha Guddiga Maamulka, Madaxweynaha iyo Madaxa Fulinta

# I MUUJINTA DAACADNIMO

## Baro Xeerkayaga

**Ku soo dhowow Xeerkayaga *Habdhaqanka Anshaxeed ee Ganacsiga* ("Xeerka").**

**Jaga kasta oo aad ka hayso Hormel Foods Corporation iyo dhammaan shirkadaha hoos yimaado ee jooga daafaha dunida (oo gudaha Xeerkan loogu wada yeerayo "Shirkadda"), marmarka qaar waxaad wajihi doontaa go'aamo ganacsi oo adag. Wakhtiyadaas ayaa ah xiliyada laga yaaba inaad u baahato inaad su'aal weydiiso ama aad hesho talo ku saabsan habka ugu wanaagsan ee aad wax uga qaban karto xaaladda. Nasiib wanaag, Shirkaddayadu waxay bixisaa dhigaalo badan oo aad hagid ka heli karto. Waxaan leenahay Xeer kaasoo bixinayo waxyaabaha aasaaska u ah dooqyada iyo ficilada goobtayada shaqada. Waxaan sidoo kale ku tiirsanaan karnaa xubnaha kale ee kooxda, oo ay ku jiraan hoggaamiyeyaasha iyo maareeyayaasha, khubarada xaalada markaa jirto iyo dhigaalada kale ee ku qoran Xeerkayaga si ay inooga caawiyaan su'aasha ama walaaca. Iyadoo ay weheliyaan siyaasadahayaga, Xeerku wuxuu na siinayaa aalado iyo dhigaalo naga caawiya sidii aan waxyaabaha saxda ah ugu samayn lahayn sida saxda ah.**

## Sida Loo Isticmaalo Xeerkayaga

Xeerkayaga waxaa loogu talagalay inuu noqdo aalad tixraac oo soo koobaya siyaasadaha, sharciyada iyo qawaaniinta lagu dabaqi karo meel kasta oo aan ganacsi ku sameyneyno. La qabso isticmaalkiisa. Xeerku waxaa ku jira macluumaad heer sare ah oo ku saabsan arrimahayaga ugu badan ee la xiriira shaqada. Hase yeeshee, Xeerku ma dabooli karo xaalad kasta oo ka dhici doonta goobta shaqada. Haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah, tixraac siyaasadaha iyo dhigaalada aadka u faahfaahsan ee ku taxan dhammaadka mowduuc kasta, ama la xiriir mid ka mid ah ilaha shirkadda ee waxtarka leh ee lagu xusay gudaha dukumiintiga laguna soo koobay dhammaadka Xeerka.

## Cidda ay Qasab ku Tahay Inay Raacdo Xeerkayaga

Dhammaan shaqaalaha, saraakiisha iyo agaasimayaasha Shirkadda (oo gudaha Xeerkan loogu yeerayo "xubnaha kooxda") waa inay dhowraan Xeerka markay joogaan meel kasta oo aan ganacsi ka samayneyno. Shuraakada ganacsi ee Hormel Foods waa inay sidaas oo kale sameeyaan markay matalayaan Shirkadda.



## Ka-tanaasulaadyada iyo Ka-reebitaannada

Shirkadda ayaa xili kadiba dib-u-eegis ku samaysa Xeerka waxayna ku talineysaa isbeddellada inay ansixiyaan Guddiga Agaasimayaasha ee Hormel Foods ("Guddiga"). Mararka ay jiraan xaalado aad dhif u ah, Shirkadda ayaa go'aamin karta inay habboon tahay in laga tanaasulo qoddob ka mid ah Xeerka. Dhammaan ka-tanaasulaadyada noocan ah waa inuu oggolaado keliya Guddiga waana in la diiwaangeliyo.

### SU'AAL KU SAABSAN XAALAD DHAB AH

**S Xeerkan cusub wuxuu u muuqdaa mid aad uga duwan Xeerkii hore. Maxaan u beddelnay? Miyuu beddelayaa Xeerkii hore? Maxaa dhacaya haddii aan iibsano shirkad leh xeer iyo siyaasado gaar u ah?**

J Haa, Xeerkani wuxuu u muuqdaa mid aad uga duwan midkii hore. Waxaan beddelnay qaabkiisa waxaana ku darnay waxyaabo badan si aan u cusboonaysiino Xeerka oo aan uga dhigno mid ku habboon jawigayaga ganacsi ee haatan jira. Waxaan sidoo kale sameynay isbeddello waxaana ku darnay waxyaabo cusub si aan uga dhigno mid aad ugu fudud isticmaalka xubnaha kooxda, oo ay ku jiraan tixraacyada siyaasado iyo dhigaalo kale oo waxtar leh oo bixinayo faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan mowduucyada. Xeerkani wuxuu bedelayaa Xeerkayagii hore wuxuuna mudnaanta koowaad ka leeyahay wax kasta oo xeerar ama siyaasado ah oo ay adeegsato Shirkadda. Haddii ay dhacdo inuu yimaado iska hor imaad u dhexeeya shuruudaha Xeerkayaga iyo sharciyada ama dhaqamada deegaanka, la tasho maareeyahaaga, hogaamiyahaaga ama Waaxda Sharciga si aad uga hesho hagitaan ku saabsan waxa saxda ah ee la sameeyo.

# Faham Waxa lagaa Filayo

## Mas'uuliyadaha Aan Dhammaanteen Wadaagno

- **Baro oo raac miqyaasyadayada.** Dhowr sharciyada, qawaaniinta iyo miqyaasyada Xeerkayaga iyo siyaasadaha lagu dabaqi karo shaqadaada.
- **Ixtiraam dadka kale.** Noqo mid ku jira kooxda oo abuuro dareen u dhanaansho, adoo qiimeynayo kala duwanaanshaha dadka. U shaqeeya koox ahaan.
- **Inta aadan falin ka fiirso.** U dhaqan hab muujinayo anshax, ixtiraam iyo xirfad. Tixgeli in ficilkaagu waafaqsan yahay miqyaasyada kahor intaadan qaadin.
- **Buuxi shuruudaha.** Waqti haboon ku dhammaystir dhammaan koorsooyinka tababarka ee khasabka ah iyo shuruudaha kale ee anshaxa iyo u hoggaansanaanta.
- **Iskaashi la yeelo dadka markii lagaa codsado.** Runta sheeg oo waxba ha qarin marka aad ka jawaabayso su'aalaha hanti-dhowrka, baaritaanka ama kormeerka.
- **Hadal.** Ka keen su'aalo haddii ay jiraan wax aadan fahansaneyn. Soo sheeg dhaqan-xumada iyo xadgudubyada ku aadan Xeerka, siyaasadahayaga ama sharciga.
- **Mas'uul ka noqo ficiladaada.** Dhammaanteen waxaan ka mas'uul nahay inaan ku lahaano oo ku joogteyno anshax fiican gudaha shirkadayada inagoo adeegsanayno go'aanadayada iyo dhaqanadayada.


## Mas'uuliyadaha Dheeraadka ah ee Maareeyayaasha

- **Noqo tusaale wanaagsan.** Tusaale u noqo daacadnimo, xishood iyo ixtiraam. Qiro khaladaadka. Ka dhabee ballanqaadyadaada. Marna ha ku cadaadin qof inuu sameeyo wax aadan jeclaan lahayn inaad adigu samayso.
- **Ahow qof furfuran.** Abuur jawi ay dadku rabaan inay si xor ah ugu dhiibtaan fikradahooga, ku wadaagaan ra'yigooda ayna ku yeeshaan wadahadalo daacad ah. Diyaar u ahow inay si daacad ah kaagala hadlaan su'aalahooda iyo walaacyadooda. Dhageyso.
- **Noqo qof firfircoon.** U deji xubnaha kooxda waxyaabaha laga filayo oo sii jawaab-celin waqtiyeysan oo diirada saarta mawduuca si aad ugu dhiirrigeliso inay sameeyaan waxa saxda ah.
- **Noqo qof go'aanada uu gaarayo kala tashado dadka kale.** Marka aadan hubin sida aad u bixinayso hagis ama sida aad u qaadayso tallaabo ku saabsan arrin anshaxeed, la tasho asxaabtaada oo weydiiso fikradahooda ama ka raadso hagitaan khubarada mawduuca ee ka tirsan Shirkadda. Xusuusnow – ma jiro qof wada yaqaano jawaabaha.
- **Noqo qof dadka waxbaro.** Kala hadal xubnaha kooxdaada Xeerka iyo sida loogu dabaqi karo shaqadooda. Ka caawi xubnaha kooxda iyo shaqaale kasta oo ku-meelgaar ah, qandaraasleyda ama kooxaha kale ee aad kormeerto inay fahmaan waxyaabaha aad ka filanayso iyo mas'uuliyadahooda.
- **Noqo midwax joogteeyo.** Had iyo jeer kula xisaabtan naftaada iyo dadka kaleba mas'uuliyadaha loo xilsaaray iyo dhaqanka anshaxeed, xitaa marka ay adag tahay.
- **Feejignow.** Dhexgel oo jooji dhaqan kasta oo ixtiraam darro ah ama si uun xadgudub ugu ah Xeerka una soo sheeg arrinta dadka ku habboon ee jooga goobtaada.
- **Ha u dulqaadan aargoosiga.** Marnaba ha ka aargoosan qof. Had iyo jeer la xisaabtan dadka kale haddii ay aargoosasho geystaan.
- **Noqo qof taageero Barnaamijka.** Hoggaamiye ahaan, waxaad dejinaysaa waxa laga qabo iyo sida loogu dhaqmo barnaamijkayaga anshaxa iyo u-hoggaansanaanta. Haddii aad uga hadasho si fiican oo aad si firfircoon u taageerto, kooxdaada ayaa laga yaabaa inay sidaas oo kale sameeyaan.

## La-xisaabtanka iyo Edebta

Inkastoo Hormel Foods ay ku tiirsan tahay daacadnimada iyo u-hoggaansanaanta ikhtiyaariga ah ee Xeerka ee qof walba, haddana Shirkadda dhammaantee ayaa dhammaanteen nagala xisaabtamaysaa anshaxayaga. Dhammaan xubnaha kooxda waxaa laga qaadayaa tallaabo edbin ah oo waafaqsan sharciga lagu dabaqi karo haddii ay ku kacaan dhaqan-xumo. Liiska soo socda ma aha mid dhammaystiran, laakiin xadgudubyadaan ayaa ah tusaalooyinka ku xadgudubka Xeerkayaga iyo/ama siyaasadahayaga: diidmada bixinta ama bixinta macluumaad been ah oo ku saabsan xadgudubyada; dayacaada ama iska-indho-tir qasad ah oo uu geysto kormeeraha ama maareeyaha oo la xiriira xadgudub; iyo nooc kasta oo aargoosi ah oo loo geysto xubin ka tirsan kooxda markuu soo sheego dhaqan-xumo ama uu kaqaybqaato baaritaan.

Tallaabo edbin ah ayaa la soo rogi karaa, waxayna gaari kartaa oo ku jiro ka hakinta shaqada iyo ka joojinta shaqada. Dembiiluhu wuxuu sidoo kale wajihi karaa dacwad madani ah ama sharciyeed. Ogsoonow in Shirkaddu ay xaq u lahaan karto inay soo rogto edbin loogu talagalay ku xadgudubka Xeerka, xitaa haddii dhaqanka xubinta kooxdu uusan gaarsiisneyn heerka xadgudubka sharciyeed. Shirkaddu waxay sidoo kale qaadi doontaa tallaabo sixitaan ah si gacan looga geysto kahortagga xadgudubyo dheeraad ah.



## Samaynta Xulashooyin Anshaxeed

**Mar kasta oo aadan hubin waxa saxda ah ee ay tahay in la sameeyo, is weydii:**

- **(H) (M) Ma sharci baa?**
- **(H) (M) Ma waafaqsan tahay siyaasadaha Shirkadda iyo Xeerkayaga?**
- **(H) (M) Dan ma u tahay Shirkadda iyo daneeyayaashayada?**
- **(H) (M) Ma jeclaan lahayd inaad ku aragto warbaahinta?**
- **(H) (M) Miyay taageeri doontaa sumcadda anshaxeed ee Hormel Foods?**

**Haddii mid ka mid ah jawaabuhu tahay "maya" ama "ma hubo," ha samayn waxaas haddii uusan kormeerahaaga ama dhigaal kale oo ku qoran Xeerka uu kugula taliyo inaad samayn karto mooyee.**

### WAXA UU KA DHIGAN YAHAY

### Niyad Wanaagga

U soo sheegida si *niyad wanaagsan* waxaa loola jeedaa inaad aaminsan tahay inaad bixinayso xog dhammaystiran oo run ah, xataa haddii aan baaritaan lagu xaqiijinin inay run tahay. Haddii aad si niyad wanaag ah u soo sheegto dhaqan-xumo oo aan la xaqiijin karin, wax cawaaqib xun ah kaaga imaan maayo Hadalka aad hadashay.

## Waa maxay sababta aan u Hadlayo?

- Ma ahan keliya mas'uuliyad saaran xubin kasta oo ka tirsan kooxda inuu Hadlo, sidoo kale waa waxa saxda ah ee ay tahay in la sameeyo. Hadalku wuxuu u oggolaanayaa Shirkadda inay ogaato arrimaha u baahan in wax laga qabto si looga fogaado waxyeello suurtogal ah. Arrimaha noocan ah ayaa ka sii dari kara haddii aan la sheegin.

## Goorma ayaan Hadlaa?

- Haddii aad qabtid su'aalo ama aad u baahan tahay hagis.
- Haddii aad ogaato in lagu xadgudbay Xeerka ama dhaqan kal eoo anshax xumo ah – xitaa haddii aad ka shakisan tahay uun dhaqan-xumada.
- Haddii ay dhacdo arrin khatar gelin karta xubnaha kooxdayada, daneeyayaashayada, shirkaddayada ama sumcaddayada.
- **Haddii aad wax ogtahay, sheeg waxa isaga ah!**

## Sideen u Hadlaa?

Hormel Foods waxay bixisaa dhigaalo badan oo aad mid ka dooran karto.

- La xiriir kormeerahaaga, maareeye kale, Waaxda Sharciga, Waaxda Shaqaalaha ama kooxda Anshaxa iyo U-hoggaansanaanta.
- Isticmaal mareegta qarsoodiga ah: **https://hormelfoods.ethicspoint.com.**
- Gudaha Maraykanka iyo Kanada, wac Khadka Tooska ah ee Anshaxa iyo U-hoggaansanaanta: 1-833-672-1232.
  - Gudaha dalka Shiinaha, wac: 400-120-0204
  - Gudaha dalka Baraasiil, wac: 0800-000-0092
  - Dibadda Maraykanka, Kanada, Shiinaha iyo Baraasiil, wac adoo adeegsanayo furaha lambar ee waddankaaga, kaasoo laga heli karo: **www.business.ATT.com/collateral/access.html.**
  - Markaad wacdo furaha lambar ee waddankaaga, waxaa lagu weydiin doonaa lambarka Khadka Tooska ah ee Maraykanka. Kadibna waxaa lagugu xiriirin doontaa Takhasusle Wadaxiriir oo ku hadlo afkaaga hooyo.
- Dhammaan wicitaanada ayaa laga dhigi karaa kuwo qarsoodi ah.
- Dhammaan xiriirada iyo warbixinada waxaa loo maareyn doonaa si qarsoodi ah ilaa iyo inta suurtagal ah.

## Ka waran aargoosiga haddii aan Hadlo?

- Shirkadu uma dulqaadan doonto nooc kasta oo uu yahayba aargoosiga lala beegsado qof si niyad wanaagsan uga soo warbixiyay dhaqan-xumo ama kaqaybqaatay baaritaan gudaha shirkadda ah.
- Haddii aad aaminsan tahay inaad tahay dhibbane aargoosi, isla markiiba wac Khadka Tooska ah ee Anshaxa iyo U-hoggaansa-naanta.

## Ka waran haddii aan ka Hadlo Khadka Tooska ah?

- Kooxda Anshaxa iyo U-hoggaansanaanta ama wakiilka Khadka Tooska ah ee dhinacyada saddexaad ayaa ka sameyn doona warbixin su'aashaada ama walaacaaga.
- Lambarada telefoonka iyo cinwaanada IP-ga lama raadraaco marka lala xiriirayo Khadka Tooska ah.
- Dhammaan macluumaadka ayaa waxaa loo hayn doonaa si qarsoodi ah ilaa iyo inta suurtogal ah. Keliya shaqaalaha Shirkadda ee lagama maarmaanka ah ayaa dib-u-eegi doona arrinta oo go'aan ka gaari doona tallaabooyinka xiga. Mararka qaarkood waxaa dhici karta in loo baahdo in magacaaga la wadaago, sida in lala wadaago baaraha; si kastaba ha ahaatee, hoggaankaaga ma ogeysiineyno warbixintaada. Waxaan kugu dhiirigelinaynaa inaad bixiso magacaaga maadaama uu gacan ka geysan doono fududeynta baaritaanka.
- Baaritaan ayaa la samayn doonaa haddii loo baahdo. Adiga iyo dad kale ayaa laga yaabaa in la idin wareysto. Waxaa muhiim ah in lala shaqeeyo baaraha.
- Marmar dib u fiiri si aad u ogaato heerka ay warbixintaada marayso. Haddii aad si qarsoodi ah u soo sheegto, baaritaanka ayaa laga yaabaa inuu dib u dhaco haddii aadan fiirin heerka ay marayso warbixintaada. Waxaa jiri kara codsi la soo dhajiyay oo kaa sugaya inaad bixiso macluumaad dheeraad ah kahor inta uusan baaritaanku bilaaban.
- Haddii warbixintaada la xaqiijiyo inay run tahay, Shirkadda ayaa qaadi doontaa tallaabo ku habboon. Waa lagu soo ogeysiin doonaa in arrinta la xaliyay, laakiin natiijada ayaa laga yaabaa inay ahaato qarsoodi. Haddii aanan la xaqiijin, sidoo kale waa lagu soo ogeysiin doonaa.

DHIGAALADA

## Si Aad Wax Dheeraad ah U Ogaato

- Siyaasadda Aargoosi La'aanta / Ganaax La'aanta

S

# U-HEELANAANTAYADA IN BADQABKA LA SIIYO MUUDNAANTA KOOWAAD

**Ma jiraan wax udub dhexaad u ah waxa aan nahay oo aan ka ahayn u-heelanaantayada badqabka iyo caafimaadka dadkayaga, tayada badeecadahayaga iyo fayoqabka xoolaha aan daryeelno. Si aan u fulino ballanqaadkan, waxaan qaadannay qaar ka mid ah miqyaasyada ugu sarreeya ee badqabka, caafimaadka iyo badqabka cuntada/miqyaasyada tayada ee ganacsigayaga.**

## Ilaalinta Badqabka iyo Caafimaadka Xubnaha Kooxda

Ahmiyadayada koowaad waa inaan jawi shaqo oo badqab ah oo sugan siino xubnaha kooxdayada iyo booqdeyaasha. Waxaa naga go'an inaan ka wada shaqeyno sidii aan u tirtiri lahayn khataraha iyo dhaqanada gacan ka geysta dhaawacyada iyo jirrooyinka shaqada la xiriira inagoo wax ka qabaneyno khataraha caafimaadka, badqabka iyo halisyada amniga ee goobaha shaqada.

### Samee Waxa Saxda ah

- **Marna ha ilaawin - Badqabka ayaa leh mudnaanta koowaad.** Mas'uuliyad ayaa kaa saaran inaad ilaaliso badqabkaaga iyo badqabka xubnaha kooxdaada adigoo raacaya dhammaan sharciyada caafimaadka iyo badqabka iyo siyaasadaha badqabka ee Shirkadda ee khuseeya shaqadaada. Ha iska indho tirin dhaqanada halista ah ee dadka kale geysanayaan ee dhinac mara sharciyadayada caafimaadka iyo badqabka. Ka caawi dadka kula shaqeeya, shurakada ganacsi, shaqaalaha ku-meelgaarka ah, qandaraasleyda iyo kooxaha kale inay raacaan siyaasadahayaga iyo habraacyadayada badqabka.
- **Ilaali xaruntaada.** Nabadgelyada jirka ayaa qayb muhiim ah ka ah goobta shaqo oo badqabka ah. Nabadgelyada xarunta ayaa hoos u dhacayso marka qufullada, kaararka furaha ah iyo muuqaalada la socosho aan si habboon loo isticmaalin.
- **Feejignow oo noqo qof taam u ah shaqada.** Marnaba ha shaqayn adigoo la sakhraansan khamri, maandooriyaha la xakameeyo, daroogo sharci darro ah ama daawooyin wax u dhimaya awoodaada inaad si badqab ah u shaqayso. Haddii khamri lagu bixiyo munaasabad Shirkaddu leedahay, qiyaas haboon uun cab. Ha imaan shaqada haddii aad la xanuunsaneyso cudur faafa.
- **Marna ha u dulqaadan rabshadaha goobta shaqada.** Kuwani waxaa ka mid ah dhaqan hanjabaad ah, rabshad la socoto, dagaal ah ama iska hor imaad ah, kaasoo ay tahay in isla markiiba loo soo sheego maamulka. Intaa waxaa dheer, qoryaha iyo hubka kale lagama oggola meel kasta oo ka mid ah xarumaha Shirkadda.
- **U fiirso khataraha.** Waxaad kaalin muhiim ah ka qaadanaysaa badqabka markaad ka warhayso dadka kale, agagaarka goobtaada shaqada aadna aqoonsato khataraha badqabka. Haddii aad aragto qof ama wax u muuqda khalad ama ka baxsan meesho laga rabo, isla markiiba soo sheeg.
- **Hadal.** Si degdeg ah u soo sheeg xaalad kasta oo halis ah ama aan badqab ahayn, dhaawacyada ama jirrooyinka shaqada la xiriira.

### SU'AAL KU SAABSAN XAALAD DHAB AH

**S** **Dhawr xatooyo ayaa dhowaan ka dhaceen xaruntayada, waxaana jirtay haweeney lagu qabtay dhismaha gudihiisa iyadoo wadata dhammaan alaabtii ay xaday – boorsooyinka haweenka, boorsooyinka lacagta la gashado iyo laabtoobyo. Kaarkayaga aqoonsiga ayaan ku soo galnaa dhismahayaga, marka sidee ayay ku soo gashay iyada?**

**J** Dadka damacsan inay geystaan xatooyo, rabshad, kharbudaad ama falal kale ayaa badanaa isku dayo inay soo galaan xarunta iyagoo soo daba galayo xubin kooxda ka tirsan oo wato kaarka aqoonsiga. Iyagoo naxariis muujinayo, xubnaha kooxda markay kaarkooda aqoonsiga ku furaan albaabkawaxayna albaabka u qabtaan qofka xiga si uusan uga xirmin kaasoo aan wadan kaarka aqoonsiga. Xusuusnow, dhammaan xubnaha kooxda ee soo galaya xarumahayaga waa inay isticmaalaan kaakooda aqoonsiga ee ay Shirkaddu siisay si ay usoo galaan. Booqdeyaasha iyo qandaraasleyda waa inay raacaan habraacyada aqbalida ee Shirkadda kahor intaysan soo gelin xarumaha. Dabagalka qof albaabka marayo ama oggolaanshaha soo-gelid iyadoo aan la haysan aqoonsi ayaa waxay xadgudub ku tahay habraacyada amniga ee Shirkadda marnabana lama oggola – haddii aad taqaano qofka iyo haddii kaleba. Tani waxay xadgudub halis ah ku tahay nabadgelyada goobta. Dhammaan xubnaha kooxdu waa inay xiraan kaararkooda aqoonsiga markay joogaan dhismaha Shirkadda. Haddii aad aragto qof jooga gudaha dhismaha oo aan haysan kaarka aqoonsiga ee saxda ah, soo sheeg.

DHIGAALADA

### Si Aad Wax Dheeraad ah U Ogaato

- Siyaasadda Goob Shaqo oo Xor ka ah Khamri iyo Maandooriye
- Siyaasadda Ka Badqabka Korontada
- Siyaasadda Kahortagga Dabka
- Siyaasadda Baaritaanka Dhaawaca iyo Jirrada
- Siyaasadda Xanuunada Nafta Halis Geliyo
- Siyaasadda Mas'uuliyadda Badqabka Warshada
- Jadwalka Shuruudaha Badqabka
- Siyaasadda Goob Shaqo oo Xor ka ah Tubaako
- Siyaasadda Dhaawacyada Shaqada La Xiriira
- Siyaasadda Xirida / Xakamaynta Tamarta Khatarta ah
- Siyaasadda Qalabka Dhowro Shaqsiga

S



# Ilaalinta Badqabka iyo Tayada Cuntada

Maadaama aanu nahay shirkad cunto oo caalami ah, badqabka cuntada ayaa ayad muhiim ugu ah sumcaddayada. Macaamiisha iyo iibsatada waxay ku kalsoon yihiin in Shirkadda ay soo saarto badeecooyin cunto ah oo badqab ah lehna tayo sare. Kuweenna ka shaqeeya soosaaridda cuntada iyo hababka geynta cuntada ayaa mas'uul ka ah xoojinta kalsoonidaas iyagoo mar walba raacayo dhaqanada wanaagsan ee wax-soosaarka, kaydinta iyo safrinta. Waxaan mas'uuliyaddan u qaadnaa si dhab ah waxaana si hagar la'aan uga shaqeynaa inaan u sii wadno kalsoonida dadweynaha ay ku qabaan badqabka, tayada iyo qiimaha badeecadahayaga.

## Samee Waxa Saxda ah

- **Raac sharciga iyo miqyaasyadayada.** Ha kaa go'naato inaad raacdo dhammaan sharciyada badqabka cuntada iyo siyaasadaha Shirkadda ee khuseeya shaqadaada. Xaqiiji in dadka aad wada shaqaysaan iyo shuraakada ganacsigu ay sidaas oo kale sameeyaan. Marnaba ha u dulqaadan taxaddar la'aanta ama fududeysiga shaqo marka faraha lagula jiro iyo marka la soosaarayo badeecadayahaga.
- **Xaqiiji in diiwaanada wax-soosaarka iyo ka shaqaynta alaabtu ay sax yihiin.** Samee oo diiwaangeli dhammaan hubinada tayada, tijaabooyinka wax-soosaarka, heerkulka kaydinta/safrinta iyo xogta kale ee ay tahay in la dhammaystiro oo la diiwaangeliyo. Ha tafatirin, wax ha ka beddelin, been ha ka sheegin ama dib ha u celin taariikhda xogta. Xaqiiji u diiwaangelinta si waqtiyeysan oo sax ah hanti-dhowrka iyo indha-indhaynta oo dhan.
- **Hadal.** Isla markiiba u sheeg kormeerahaaga wax kastoo saamayn ku yeelan kara badqabka iyo tayada badeecoyinkayaga cuntada.

OGOW

## XAQIIJI IN BADEECADOOYINKAYAGA CUNTADA AH AY YIHIIN BADQAB

- **Guriga joog haddii aad la xanuunsan tahay cudur faafa.**
- **Gacmaha dhaqo oo raac dhammaan habdhaqanada wanaagsan ee wax-soosaarka (GMP-yada) ee dharka, qalabka is-ilaalinta iyo maaraynta badeecada.**
- **Ka dhig aaggaga wax-soosaarku kuwo nadiif ah oo aan lahayn wax qashin ah.**
- **Kahortag in cuntada ceyriinka ah ay wasakhayso cuntada diyaarka u ah in la cuno.**
- **Ka ilaali shay kasta oo qalaad ama kiimikada wasakheeyaan ee maaddooyinka cuntada ama baddeecooyinka.**
- **Raac habraacyada habboon ee nadiifinta iyo dayactirka qalabka.**
- **Joogtee u-hoggaansanaanta dhammaan siyaasadaha badqabka iyo tayada cuntada ee la xiriira wax-soosaarka iyo kaydinta maaddooyinka cuntada iyo baddeecooyinka la dhammeystiray.**

## SU'AAL KU SAABSAN XAALAD DHAB AH

**S** **Qofka ila shaqeeya ayaa qolka nasashada ka soo galay aagga wax-soosaarka, wuxuu dhaqday gacmaha, kadibna wuxuu cunay qaddadiisa. Markuu wax cunay kadib, wuxuu si toos ah ugu noqday shaqadiisa waxsoosaarka isagoo aanan mar kale iska dhaqin gacmaha. Tani ma dhibaataa?**

**J** Haa. Xeerarkayaga gacmo-dhaqashada waxay ku saleysan yihiin sharciyada iyo miqyaasyada badqabka cuntada. Siyaasadahayagu waxay uga baahan yihiin xubnaha kooxda ee ku lug leh dhinac kasta oo ka mid ah wax-soosaarka cuntada ay dhaqaan gacmahooda kahor inta aysan taaban ama qaban wax kasta oo lagu daro ama taabta alaabta cuntada ah. Qofka aad wada shaqaysaan waa inuu maydho gacmihiisa kahor intuusan ku noqon shaqada. Xubin kooxeed ahaan, waa inaad u ogeysiisaa qofka aad wada shaqeysaan inuu raaco habraacyadayaga tayada iyo badqabka cuntada oo ay ku jiraan habraacyada habboon ee nadaafada. Waa mas'uuliyad saaran qof walba inuu xusuusiyo dadka la shaqeeya inay raacaan hab-maamuusyadayaga badqabka cuntada haddii ay iloobaan.

DHIGAALADA

## Si Aad Wax Dheeraad ah U Ogaato


- La xiriir kooxda maareynta tayada ee deegaankaaga ama maamulka maareynta tayada ee shirkadda

# Joogtaynta Hababka Maareynta Xayawaanka ee Badqabka Leh

Waxaa naga go'an inaan joogtayno miqyaasyada ugu sarreeya ee daryeelka xoolaha ku jira dhammaan silsiladayada saadka iyo habka qaadashada. Hormel Foods uma dulqaadato wax ku saabsan in si xun loola dhaqmo xayawaanka iyadoo loo geysanayo xadgudub ama dayac. Jawi badqab ah oo naxariis leh ayaa lagu hayn doonaa xayawaan kasta inta uu nool yahay, oo ay ku jiraan yaraynta diiqada, maaraynta baahiyaha bulsheed iyo xakamaynta heerkulka.

## Samee Waxa Saxda ah

- **Xusuusnow in badqabka xayawaanku adiga kugu xiran tahay.** Haddii aad ka shaqayso xoolaha ama aagga xoolaha lagu hayo, raac dhammaan siyaasadaha iyo dhaqanada shirkadda ee ku saabsan badqabka maaraynta xayawaanka.
- **U fejignow wixii calaamado ah oo muujinayo in xoolaha si xun loola dhaqmay.** Waa waajib anshaxeed oo saaran dhammaan xubnaha kooxda inay xaqiijiyaan in dhammaan xubnaha kooxda, alaab-qeybiyeyaasha iyo shuraakada kale ee ganacsi ee ka shaqeeya xayawaanka ay si naxariis iyo badqab leh ula dhaqmaan xayawaan kasta oo ay kula kulmaan Shirkadda. Haddii aad aragto wax ku walaac geliyo, ha iska indha tirin.
- **Hadal.** Soo sheeg wax kastoo xadgudub suurtogal ah, dayacaad ah ama si xun ula dhaqanka xayawaanka aan daryeelno, haddii dhacdadu tahay mid loo qasday ama aan loo qasdinba.



OGOW

## SHAN ARIMOOD OO KU SAABSAN HABDHAQANKA FAYOQABKA XAYAWAANKA EE WANAAGSAN

**Dhammaan xayawaannada aan daryeelno, waa inaan:**

- **Siino biyo iyo nafaqo si aan u daboolno baahiyahooda maalinlaha ah.**
- **Maareeynaa xaaladaha bay'adeed si aan xayawaanada uga yareyno diiqada aan loo baahnayn.**
- **Yareyno xaaladaha xayawaanada u keeno xanuun ama dhaawac suurtagal ah.**
- **Bixino boos ku filan, tas-hiilaad habboon iyo adeegsiga habboon ee qalabka si loo maareeyo xayawaanada.**
- **Yareyno ama baabi'ino cabsida iyo dhibka ka dhasha dhexgalka ay xoolaha la yeelanayaan dadka, qalabka ama xayawaanada kale.**

## SU'AAL KU SAABSAN XAALAD DHAB AH

**S** **Waxaan booqanayay mid ka mid ah xarumaha dhinacyada saddexaad ee aan xoolaha ka soo qaadano, waxaana halkaas ku arkay xero ay ka buuxaan doofaaro leh nabarro yaryar. Xoolaha ku jira xerooyinka kale ma aysan lahayn dhaawacyadaan. Waxaan u malaynayaa in xeradu ku jiraan musbaaro ama shay kaloo caarad leh oo dhaawacyadani sababi kara. Waxba ma aanan samayn waqtigaas, laakiin ma u malaysaa inay ahayd inaan wax sameeyo?**

**J** Waxaad samaysay waxa saxda ah markaad ogaatay tani oo aad codsatay hagis, inkastoo aadan ka shaqaynaynin xaruntan. Haddii ay tani oo kale ku qabsato mar kale, waa inaad arrinta u soo bandhigtaa kormeeraha aagga xerada ama aad u sheegtaa maareeyaha xaruntа.

DHIGAALADA

## Si Aad Wax Dheeraad ah U Ogaato

- Xeerka Anshaxa ee Alaab-qeybiyeyaasha
- Siyaasadda Ilaalinta Xoolaha

R

# U-HEELANAANTAYADA IS-IXTIRAAMKA

**Markaan si wadajir ah u wada shaqeyno si aan iskula dhaqano si ixtiraam iyo caddaalad ku jirto, oo aan yeelano xiriir halkii aan kala go'i lahayn, waxaan abuureynaa goob shaqo oo soodhaweyn iyo xirfad leh. Waxaan ula dhaqanaa dadka kale sida aan rabno in la noola dhaqmo. Sidaas ayay u fududahay.**

## Qiimaynta Ka Mid Noqo-shada, Ka Mid Ahaanshaha, Kala-duwanaanshaha iyo U-dhaqanka Si Cadaalad ah

Waxaan ku dadaalnaa inaan joogtayno dhaqan kala duwanaasho iyo u dhanaansho leh kaasoo qof walba uu dareemayo inuu ka mid yahay. Mid kasta oo inaga mid ah wuxuu xaq u leeyahay goob shaqo taasoo lagu soo dhaweeyo laguna qiimeeyo kala duwanaanshaha aan leenahay. Kala duwanaanshaha xubnaha kooxdayada, macaamiishayada, alaab-qeybiyeyaashayada iyo shurakadayada kale ee ganacsi ayaa naga caawiya inaan si wanaagsan ugu adeegno macaamiishayada. Waxaan soo dhaweyneynaa in si cadaalad ah loola dhaqmo qof walba inagoo kor u qaadneyna fursadaha loo siman yahay, maxaa yeelay qof walba wuxuu u qalmaa fursad uu ku guuleysto.

## Samee Waxa Saxda ah

- **Si firfircoon u taageer ka mid noqoshada, ka mid ahaanshaha iyo kala duwanaanshaha.** Qaddari oo soo dhowee dadka aad wada shaqaysaan iyo shuraakada ganacsi adigoo noqonayo mid u furfuran aragtidooda, fikradahooda iyo dhaqamadooda isla markaana u nugul arrimaha bulsheed ee saamayn ku yeelan kara iyaga. Taageer dadka wada shaqeeyo ee kala duwan adigoo saaxib la noqonayo, kuna dhiirigeli inay la soo xiriiraan kooxahayaga dhigaalada shaqaale (ERGs).
- **Kormeerayaasha – Dhiirigeli oo kor u qaad fursadaha loo siman yahay.** Shaqaaleysii, jaaji, dallacsii, sii magdhow soo ka qaad tallaabo edbin adigoo ku salaynayo kaliya shahaadooyinka qofka, xirfadaha iyo guulaha ama ficillada uu muujiyay, iyo sharciga lagu dabaqi karo – marnaba ha ku salaynin sifooyin shaqsiyeed oo aan xiriir la lahayn waxqabadka shaqo. Ka taxadar sida eexashadaadu u saamayn karto go'aanada noocan ah.
- **Hadal.** Ka hadal haddii aad aragto takoor ama adiga laguu geysto takoor ama dhaqan aan sharci ahayn oo takoorayo dadka kale.



OGOW

### FURSADAHA LOO SIMAN YAHAY

**Takoorida dadka iyadoo lagu salaynayo kala soocidooda dhowrsan ayaa sharci-darro ka ah Maraykanka iyo waddamada kaleba waxayna ka soo horjeeddaa u-heelanaantayada inaan samayno waxa saxda ah. Shirkaddu waxay fursado shaqo iyo fursado dallacsiin oo loo siman yahay siisaa dhammaan dadka u-qalma mana sameyso takoor ku saleysan jinsiyada, midabka, diinta, jinsiga, qaabka jinsiga, aqoonsiga jinsiga, asalka qarameed, da'da, naafanimada, heerka ciidanimo ama sifo kasta oo kale oo uu dhawro sharciga ama siyaasadaha shirkadda.**

### FAA'IIDOOYINKA KA MID NOQOSHADA IYO KALA DUWANAANSHAHA

**Jawiga shaqo ee soodhaweynta iyo kala duwanaanshaha leh wuxuu keenaa:**

- **Wadashaqayn iyo hal-abuur ka jira goobta shaqada.** 
- **Kaqaybgalka iyo horumarinta xirfadeed ee xubnaha kooxdayada.** 
- **Macmiil kala duwan iyo kooxaha macaamiisha ah ee loogu talagalay badeecoyinkayaga ballaaran, ee kala duwan.** 
- **Waxa aan nahay shirkad ahaan iyo hoggaan ganacsi ahaan.** 

## SIDA LOO SAMEEYO U DHAQANAANSHO BUUXDA

- Noqo qof u furan fikrado kala duwan.
- Diyaar u noqo inaad dhageysato dadka kale.
- Baro oo ku biir dadka kula shaqeeya ee sida caadiga ah aan kula macaamilin.
- Ha yeelan fikrado mala-awaal ah.
- Ka fogow erayada xukminta ah.
- Kahortag faallooyinka ku salaysan fikradaha khaldan oo gacan ka geyso inaad dadka kale waxbarto.
- U adeegso magac-u-yuulada/magacyada/ereyada la doorbidayo si habboon.
- Saaxiib la noqo dadka kale.



## SU'AAL KU SAABSAN XAALAD DHAB AH

**S** **Shaqaale cusub oo ka soo guuray Ciraaq ayaa hadda ku soo biiray kooxdayda. Waxaa la noo sheegay inuu ku dhaqmi doono diintiisa oo uu sameyn doono khilaawo uuna salaad tukan doono inta lagu gudajiro xilliyada nasashooyinka ee la qorsheeyay. Maanta waxaan arkay isagoo cagahiisa ku dhaqaya waaskada musqusha. Aniga iyo dadka ila shaqeeya waxaan u aragnaa tani inay tahay nadaafad-darro. Dhaqankan ma la joojin karaa?**

**J** Maya. Shirkadda waxaa ka go'an inay tixgeliso dhaqanka diimeed ee xubnaha kooxda ee jooga goobta shaqada iyadoo raacayso mas'uuliyadaha Shirkadda ee uu dhigayo sharciga lagu dabaqi karo. Sida laga soo xigtay Golaha Xiriirka Mareykanka iyo Islaamka, "Muslimiinta waxaa laga rabaa inay wajigooda, gacmahooda iyo cagahooda ku dhaqaan biyo nadiif ah salaadda kahor. Dhaqitaankan waxaa caadiyan lagu sameeyaa waaskada musqusha ama xarun kale oo leh biyo socda." Sidaas darteed, Shirkaddu waxay tixgelin doontaa dhaqankan wayna ka oggolaan doontaa xarumahayaga, laakiin waxay soo rogi kartaa xannibaadyo, sida in keliya hal waasko loo qoondeeyo dhaqankan.

DHIGAALADA

## Si Aad Wax Dheeraad ah U Ogaato

Macluumaad ku saabsan ka mid noqoshada iyo kala duwanaanshaha ka hel Pivot hoosta Horumarinta Talantiga (Talent Development).

- Iimaylka: Inclusion_and_Diversity@hormelfoods
- Fursadaha Shaqo ee Loo Wada Siman Yahay (EEO) iyo Bayaanka U Waxqabashada Dadka La Takooro
- Siyaasadda Fursadda Shaqo ee Loo Siman Yahay

# Xoojinta Goob Shaqo oo Ixtiraam leh

Dhammaanteen waxaan xaq u leenahay inaan ka shaqeyno jawi xushmad leh oo xor ka ah cagajugleyn, xadgudub iyo dhibaateyn. Shirkadda uma dulqaadanayso nooc kasta oo dhibaateyn ah, oo ay ku jiraan dhibaateynta jinsiyeed iyo xoogsheegashada, ee lala beegsado xubin kasta oo ka tirsan shaqaalahayaga. Xor ka ahaanta dhibaataynta iyo xadgudubka waxay abuurtaa dhaqan xushmad leh oo loo dhan yahay kaasi oo dhammaanteen aan noqon karno kuwo wax soo saar leh, qof walbana uu dareemayo in la ixtiraamayo.

## WAXA UU KA DHIGAN YAHAY

### Dhibaateynta sharci-darada ah

Dhibaateyntu waa fal jireed, hadal, dhaqdhaqaaq ama fal galmo oo sharci-daro ah marka ay buuxiso afartan qodob:

- Haddii ay tahay mid aan la rabin.
- Haddii ay tahay mid qofka meel kaga dhac ku ah.
- Haddii ay tahay mid daran ama baahsan.
- Haddii ay la xiriirto ama sababta loo sameynayo ay tahay kala-soocid sharci ahaan dhowran.

Qaar ka mid ah falalka xadgudubka ah ama hanjabaadda ah ayaa laga yaabaa inaysan ahayn sharci-daro, balse fal kasta oo noocan ah ayaa weli xadgudub ku ah siyaasadaha Shirkadda.

OGOW

## TUSAALOOYINKA DHIBAATEYNTA

**Dhibaateyntu waxay leedahay qaabab badan waxayna u ekaan kartaa sidan:**

- **Falal ama codsiyo galmo oo uusan qofka loo geysanayo rabin.**
- **Hadalo, tilmaamo ama taabasho jireed oo aan la rabin.**
- **Waraaqo shaqsiyeed, qoraallo, farriimaha baraha bulshada ama iimaylo uusan rabin qofka loo dirayo.**
- **Soobandhigida agabyo ay galmo ku cadahay ama agabyo kale oo meel ka dhac ah.**
- **Kaftan ama faallooyin ku saabsan galmo, jinsiyad ama aflagaado ah.**
- **Caay, hanjabaad ama jeesjees.**
- **Ugu yeerida dhibaateeteyaasha "dhibbaneyaal" ama "ashtakoodayaal."**

## Samee Waxa Saxda ah

- **Gacan ka geyso abuurida jawi shaqo oo ixtiraam leh.** Ula dhaqan dhammaan dadka aad wada shaqaysaan, shurakada ganacsi iyo macaamiisha si xushmad iyo xirfad leh mar walba, inta lagu gudajiro saacadaha shaqada iyo kadib saacadaha shaqada, iyo inta aad joogto dhammaan goobaha ganacsiga, haddii aad joogto gudaha goobta shaqada iyo haddii aad joogto dibaddaba.
- **Qaad tallaabo.** Midkiinba midka kale ha caawiyo adinkoo ka hadlaya marka dhaqanka qof uu adiga ku dhibayo ama uu dhibayo dadka kale. Isku day inaad soo dhex gasho haddii aad aragto dhaqan liidid ama dhibaateyn ah oo u sheeg dembiilaha inuu joojiyo.
- **Hadal.** Marnaba ha u dulqaadan ama ha iska indho-tirin handadaad ama dhaqan xadgudub ah nooc kasta uu yahayba. U sheeg maareeyahaaga ama wakiilkaaga Waaxda Shaqaalaha dhaqan kasta oo aad la kulanto ama aad aragto oo liidid, xaqiraad, xadgudub ama dhibaateyn ah.
- **Maareeyayaasha waxaa waajib ku ah inay wax ka qabtaan.** Kuwa haya jagooyinka kormeerka iyo maamulka ayay mas'uuliyad gaar ah ka saaran tahay inay wax ka qabtaan dhibaataynta markay ogaadaan. Waa inay soo dhexgalaan oo ay joojiyaan dhaqanka, kadibna si degdeg ah ugu soo sheegaan Waaxda Shaqaalaha ama Waaxda Anshaxa iyo U-hoggaansanaanta.



## SU'AAL KU SAABSAN XAALAD DHAB AH

**S Shalay waxaan la qadeynayay dad aan wada shaqeyno, mid ka mid ah ayaana faalo kaftan ah ka bixiyay qof naafo ah. Qof kasta oo miiska fadhiyay ayaa qoslay. Waxay ahayd waqti qaddo, qof walbana wuxuu u muuqday inuu kaftanka ka helay. Qofka bixinayo faallada kaftanka ah wuxuu leeyahay naafonimo la mid ah qofka uu ka bixinayo faallada, markaa miyay u habboonayd inuu bixiyo faallada kaftanka ah?**

J Maya. Nooc kasta oo dhaqan ah oo lagu liidayo qofka kale lagama oggola meel kasta waqti kasta gudaha goobta shaqo ee Shirkadda. Lama eegayo in qofka kaftamayo uu qaba isla naafonimada qofka uu kaftaminayo ama inay tahay waqti nasasho iyo in kale. Xataa haddii dhammaan dadkii miiska fadhiyay ay qosleen, midkood ama qof maqlayay ayaa laga yaabaa inuu ka xumaaday hadalka. Arrinta ka weyn waa tan: Dhaqankan ma taageerayo u-heelanaantayada inaan si xushmad leh isula dhaqanno mana abuurayo goob shaqo oo loo dhan yahay. Kaftanka ama faallooyinka ceebeynta ah meelna kama soo galaan dhaqankayaga.

DHIGAALADA

## Si Aad Wax Dheeraad ah U Ogaato

Macluumaad ku saabsan ka mid noqoshada iyo kala duwanaanshaha ka hel Pivot hoosta Horumarinta Talantiga (Talent Development).

- Iimaylka: Inclusion_and_Diversity@hormelfoods.com
- Siyaasadda Dhibaateynta
- Siyaasadda Dhaqanka Goobta Shaqada
- Siyaasadda Aargoosi La'aanta / Ganaax La'aanta

R

# Ilaalinta Asturnaanta Shaqsiyeed

Qaar naga mid ah ayaa heli kara macluumaadka shaqsiyeed ee dadka nala shaqeeyo, shuraakadayada ganacsi iyo dadka kale ee la shaqeeya Shirkadda. Macluumaadka shaqsiyeed ee aan sugneyn waxaa loo isticmaali karaa in lagu sameeyo xatooyo aqoonsi iyo in lagu waxyeeleeyo shaqsiyaad. Waxaa naga go'an inaan ilaalino macluumaadkan oo aan helno, isticmaalno aana shaacino keliya markii looga maarmi waayo sameynta shaqooyinkayaga.

OGOW

## MACLUUMAADKA LAGU AQOONSAN KARO SHAQSIGA

**Noocyo badan oo ka mid ah macluumaadka shaqsiyeed ayaa waxaa dhowra sharciga iyo siyaasadahayaga, sida *Macluumaadka Lagu Aqoonsan Karo Shaqsiga* (PII) ee laga yaabo in loo isticmaalo aqoonsashada qof khaas ah.**

**Tusaalooyinka PII waxaa ka mid ah:**

- **Lambarrada koontada bangiga.**
- **Taariikhaha dhalashada.**
- **Lambarada kaarka bangiga.**
- **Cinwaanada iimaylka.**
- **Macluumaadka caafimaad ee shaqsiyeed.**
- **Lambarada Telefoonka.**
- **Cinwaanada guryaha.**
- **Lambarada Sugnaanta Bulshada.**

DHIGAALADA

## Si Aad Wax Dheeraad ah U Ogaato

- Siyaasadda Asturnaanta ee California
- Siyaasadda Asturnaanta ee Gudaha Shirkadda
- Siyaasadda Asturnaanta
- Siyaasadda Dhaqanka Goobta Shaqada

## Samee Waxa Saxda ah

- **Raac sharciyada iyo habraacyadayada.** Qawaaniinta asturnaanta xogta ayaa waxay shirkadaha uga baahan yihiin inay dejiyaan habraacyo habboon si loo ilaaliyo Macluumaadka Lagu Aqoosan Karo Shaqsiga (PII). Shirkaddayadu waxay leedahay habraacyo wax-ku-ool ah oo lagu ilaalinayo macluumaadkan. Haddii aad si lama filaan ah ula kulanto PII, isla markaaba u celi waaxda Shirkadda ee loogu talagalay ama u keen kormeerahaaga.
- **Si taxaddar leh u tixgeli macluumaadka shaqsiyeed ee dadka kale.** Waa inaad macluumaadka shaqsiyeed ee xubnaha kooxda ee hadeer jira iyo kuwii horeba, codsadayaasha shaqada, alaab-qeybiyeyaasha, macaamiisha, iibsatada iyo shurakada kale ee ganacsi u ilaalisaa isla sida aad u ilaaliso macluumaadkaaga.
- **U isticmaal macluumaadka shaqsiyeed ee xubnaha kooxda keliya ujeeddooyinka la xiriira shaqada.** Xubnaha kooxda waa inay bixiyaan oggolaanshaha macluumaadkooda loogu isticmaalayo ujeeddooyin kale.
- **Si taxaddar leh u isticmaal macluumaadka shaqsiyeed ee shuraakada ganacsi iyo dadka kale.** Waa in loo adeegsadaa keliya ujeeddooyin ganacsi oo sharci ah waana in aan marnaba lala wadaagin qof kale – ha ka mid ahaado ama yuusan ka mid ahaan Shirkadda – oggolaansho la'aan.
- **Si degdeg ah uga soo warbixi wax kasta oo gelida, adeegsiga ama shaacinta macluumaadka ee aan loo qasdin ama aan habooneyn.** Waxaa jiri kara sharciyo iyo waqtiyo lagu dabaqi kara.

## SU'AAL KU SAABSAN XAALAD DHAB AH

**S** **Mid ka mid ah dadka ila shaqeeyo ayaa ilmo dhashay. Dhowr innaga mid ah oo ka tirsan waaxda ayaan dooneyno inay u dirno hadiyad, laakiin ma naqaano cinwaankeeda. Cinwaankeeda ma ka codsan karaa Waaxda Shaqaalaha?**

**J** Maya. Inkastoo ay tahay in hadiyad la bixiiyo markay jiro munaasabad nololeed oo farxad ah si loo muujiyo tusaale wacan, ma weydiisan kartid Waaxda Shaqaalaha cinwaanka qofka aad wadashaqeysaan, maxaa yeelay kani ma aha codsi la xiriira shaqada. Si kastaba ha noqotee, haddii qof haysto lambarkeeda telefoonka, si toos ah ayaad ula xiriiri kartaan oo waxaad weydiin kartaan cinwaankeeda. Waxaa laga yaabaa inay ogaato inaad hadiyad u wadaan, laakiin ma xuma waayo iyada ayaad si toos ah uga ogaan doontaan haddii ay rabto inay wadaagto cinwaankeeda.

# F U-HEELANAANTAYADA KU AADDAN INAAN MACAAMIISHA IYO SHURAAKADA GANACSIGA ULA MACAAMILNO SI CADAALAD AH

**Hormel Foods ma shaqayn karto mana guulaysan karta haddii aysan haysan kaalmada shuraakada ka baxsan shirkadda. Waxaan si caddaalad ah ula macaamilnaa shuraakadayada ganacsi iyo macaamiishayada, maxaa yeelay waxaan qiimeyneynaa oo aan ka mahadcelinaa doorarka muhiimka ah ee ay ka qaataan wax-soo-saarka iyo iibinta badeecadahayaga tayada leh.**

## Ilaalinta Tartan Xor ah oo Cadaalad Ku Dhisan

Waxaan si caddaalad ah, daacadnimo iyo hufnaan leh ugu tartanaa inaan guulaysano. U-heelanaantayada inaan gebi ahaanba mar walba raacno waxa loola jeedo oo ay dhigayaan sharciyada kasoo horjeeda kalsooni-darada iyo tartanka ayaa lagu dabaqaa meel kasta oo aan ganacsi ka sameyneyno. Si cadaalad-darro ah ugama faa'ideysano macaamiisha, shurakada ganacsi ama kuwa nala tartamayo innagoo adeegsaneyno dhaqamo aan daacad ahayn, ku-takrifalayno macluumaadka, burburinayno xaqiiqooyinka ama dhaqan kasta oo kale oo aan caddaalad ahayn.

## Samee Waxa Saxda ah

- **Ku dhaqan xeerka caalamiga ah.** Ula dhaqan shurakadayada ganacsi iyo macaamiishayada sida aad rabto in laguula dhaqmo. Ula xiriir si xushmad, daacadnimo iyo caddaalad ah, oo aan lahayn wax takoor ah. Ula macaamil macaamiisha si caddaalad ah markaad kala hadlaysid barnaamijyada qiimaynta iyo ganacsiga.
- **Baro oo raac xeerarka.** Ogow waxa aad tartan ahaan samayn kartid iyo waxa aadan samayn karin marka la eego siyaasadahayaga iyo sharciyadayaga. Marnaba ha ku xadgudbin sharciyada ka soo horjeeda kalsooni-darada ama sharciyada tartanka inta aad joogto goob kasta oo ka mid ah goobaha daafaha dunida ah ee aan ku ganacsano. Iska ilaali xitaa muuqaalka aan habboonayn. Khatarta ugu weyn ee ku xadgudubyada sharciga waxay dhacdaa marka aan la macaamilayno dadka nala tartamo.
- **Si cadaalad ah u tartan.** Ka fogow dhaqamada ganacsi ee aan cadaalada ahayn ama khiyaanada ah. Ha samaynin wax loo arki karo inaad ku xaddidayso tartanka. Ka sheeg badeecadahayaga iyo awoodayada keliya wax ku saleysan xaqiiqda. Sidoo kale keliya ka sheeg xaqiiq dalabaadka loollameyaashayada.
- **Wax u dooro si caqli leh.** Gaar go'aanada gadashada ama iibinta adoo ku saleynayo keliya tayada, qiimaha iyo adeegga macmiilka. Marna ha oggolaan in xukunkaagu loo saameeyo si aan habooneyn.
- **Hadal.** La xiriir Waaxda Sharciga ama Waaxda Anshaxa iyo U-hoggaansanaanta si aad u weydiiso wixii su'aalo ama walaacyo ah ee ku saabsan dhaqanada ganacsiga.

DHIGAALADA

## Si Aad Wax Dheeraad ah U Ogaato

- Siyaasadda iyo Tilmaamaha Ka Soo Horjeeda Kalsooni-darada ee Hormel Foods Corporation

OGOW

### TARTANKA IYO SHARCIYADA KA SOO HORJEEDA KALSOONI-DARRADA

**Sharciyada tartanka ee caalamiga ah, oo loogu yeero sharciyada ka soo horjeeda kalsooni-darada ee ka jira gudaha Maraykanka, ayaa ah kuwo ballaaran oo baahsan. Xeerarku way kala duwan yihiin iyadoo lagu salaynayo xaaladda, laakiin kuwa soo socda ayaa ah hawlo ay tahay in aan <u>marnaba</u> la sameynin oo aan si degdeg ah ugu soo sheegno Waaxda Sharciga si la noo hago:**

- **Heshiis ama isfaham lala galo dadka nala tartamayo oo ku saabsan qiimaha, sicir-dhimista ama qorshayaasha ganacsiga.**
- **Kula heshiinta tartamayaasha kala qaybsiga ama xakameynta macaamiisha, alaab-qeybiyeyaasha, goobaha iibka, dalabyada ama noocyada badeecadaha.**
- **Kula heshiinta tartamayaasha inay diidaan in ganacsi ay la sameeyaan alaab-qeybiyeyaasha ama macaamiisha qaarkood.**
- **Kala hadlida tartamayaasha qiimaha jira ama qiimaha mustaqbalka, shuruudaha iibka, qorshayaasha istiraatiijiyadeed ama kharashaadka.**
- **Muujinta in go'aanka tartameed uu saameyn ku yeeshay tartame kale.**

### SU'AAL KU SAABSAN XAALAD DHAB AH

**S** **Deriskaygu wuxuu u shaqeeyaa shirkad la loollanto Hormel Foods. Maadaama aan labadeenaba ka shaqeyno qaybta iibinta ee shirkadayada, waxaan mararka qaarkood ka hadalnaa isbeddellada cusub ee ganacsiga. Shalay ayaa waxay ii soo jeedisay ka xaddidida noocyo badeecadahayaga ah goobo isku mid ah aan hadda ku wada iibino si markaa shirkad kasta ay badeeco badan uga iibiso macaamiisheeda ugu waaweyn. Waxaan ku dhahay waan ka soo fikirayaa, marka ma caadi baa in sidaas la sameeyo?**

**J** Maya. Tani waxay khalkhal gelineysaa noocyada badeecadahaga iyo goobaha aan ku iibino, waxayna taasi xadgudub ku noqoneysaa sharciyada ka soo horjeeda kalsooni-darada. In la sameeyo iskaba daa, xitaa ka hadalka qorshahan ayaa khatar ah. Waxaa laga yaabaa in deriskaagu ay hadalkaaga ah "waan ka soo fikirayaa" u qaadato heshiis aan rasmi ahayn oo ay ku dhaqaaqdo arrintaa. Waxaa fiican inaadan marnaba shaqada kala hadlin dadka kula tartamo, ama haddii ay khasab kugu tahay inaad kala hadashana, hadalku ha noqdo heer sare oo iska ilaali mowduucyada xasaasiga ah sida kala beddelashada booska iyo xaddididda noocyada badeecadaha. Haddii aad koox la fadhido, "dhakhso iskaga bax" fadhiga haddii hadalaku isku beddelo mowduucyo la xiriira xakameynta xorriyada ganacsiga. Tani waxay ka dhigan tahay inaad diiddo inaad ka hadasho mawduucaa, haddii aad ku jirto kulan rasmi ahna, codso in diidmadaadu ka muuqato qoraal kasta oo ka soo baxo kulanka. Kadibna ka tag wadahadalka oo la xiriir Waaxda Sharciga si aad sida ugu dhakhsaha badan uga hesho hagis.

# Iskaashi la Yeelashada Kooxaha Anshaxeed ee Kale

Shuraakadayada ganacsi – alaab-qeybiyeyaasha, iibiyeyaasha, qandaraasleyda, qeybiyeyaasha iyo shurakada aan wada shaqeyno – ayaa waxay door muhiim ah ka ciyaaraan guusha ganacsigayaga. Waxaan dooneynaa inaan la shuraakowno kooxo kale oo si daacadnimo ah u sameyno ganacsi oona raacno heerarka anshaxeed ee ugu sarreeya. In badan oo ka mid ah shuraakada ganacsi ee laga yaabo inaan ganacsi la sameyno ayaa waxay maraan hannaan baaritaan si loo xaqiijiyo shahaadooyinkooda iyo inay la jaanqaadayaan qiyamyada Shirkadda. Cilaaqaadyadaan ayaa lala socdaa si loo hubiyo inay jirto daacadnimo joogta ah.

## Samee Waxa Saxda ah

- **Si caqliyeysan u dooro shuraakada ganacsi.** Ku salee go'aankaaga keliya mudnaanta ay leeyihiin. Xooga saar shahaadooyinkooda, daacadnimadooda iyo kala duwanaanshaha habka xulashada. Yaysan saamayn ku yeelan cilaaqaadkooda shaqsiyeed, eexashadaada ku salaysan fikradaha khaldan ama fursadaha si aad u hesho dano gaar ah.
- **Samee dib-u-eegis rasmi ah.** Alaab-qeybiyeyaasha cusub iyo shurakada kale ee ganacsi ee inta badan ina matalayo waa inay maraan hannaan baaritaan oo ka horeeya heshiiska. Raac hababkayaga ansixinta shuraakada ganacsi.
- **La soco cilaaqaadka haatan jira.** U fejignow digniinada laga yaabo inay muujinayaan hawl aan habboonayn ama musuqmaasuq ah.
- **Waxbar shuraakada ganacsi.** Ka caawi inay fahmaan waajibaadkooda, oo ay ku jiraan kuwa la xiriira miqyaasyadayada anshaxa iyo u-hoggaansanaanta iyo qandaraasyadooda.
- **Ogow waajibaadyadaada haddii aad la shaqaynayso hay'ad dowladeed.** Haddii aad la shaqayso dowladda ama ganacsi ay dowladu leedahay ama maamusho waxaa adiga mas'uuliyad kaa saaran inaad barato, fahamto aadna raacdo sharciyada iyo qawaaniinta khuseeya cilaaqaadyadaan. Tani waxay sidoo kale ku khuseysaa marka aad la shaqaynayso hay'adaha sharciyeynta.
- **Hadal.** Wargeli Waaxda Sharciga ama Waaxda Anshaxa iyo U-hoggaansanaanta wixii ku saabsan dhinacyada saddexaad ee shuraakada nala ah ee laga yaabo inaysan buuxin miqyaasyadayaga ama shuruudahayaga, ama mar kasta oo aad aqoonsato digniinta wax khatar ah.



OGOW

### DIGNIINADA MUUJINAYO KHATARAHA DHINACYADA SADDEXAAD

**Waxay "digniin" u tahay dhaqan-xumo suurtagal ah haddii dhinac saddexaad oo matalayo Shirkadda uu sameeyo mid ka mid ah kuwan soo socda:**

- **Ay codsato lacag si ay u hesho ama u sii wado ganacsiga, ama si ay u xalliso dhibaato.**
- **Codsado in lacag la siiyo shirkad kale oo la xiriir la leh.**
- **Gudbiyo qaansheegadyo aan lahayn faahfaahin ku filan ama aan waafaqsaneyn heshiiska.**
- **Diro codsiyada lacag-celinta oo si liidata loo qoray ama ay codsato kharashyo shaki kujira.**
- **Ka codsado Shirkadda inay diyaariso dukumentiyo been ah nooc kastoo ay yihiinba (tus.,, qaansheeg).**

### SU'AAL KU SAABSAN XAALAD DHAB AH

**S** **Waxaan maareeyaa alaab-qeybiye yar oo si fiican ula shaqeeyay Hormel Foods sannado badan. Laakiin sannadkii la soo dhaafay, alaab-qeybiyihii waa la iibsaday marka waxyaabo ayaa isbeddelay. Hadda waxay ii keenayaan qaansheegadyo la rabo in lacagtooda la bixiyo balse aan lahayn faahfaahinada shay kasta, iyo agabyo tayo hoose leh iyo qiimo sare oo aan waafaqsaneyn heshiiska hadda jira. Sideen wax uga qabtaa tani?**

**J** Arrimaha aad sheegtay waxay digniino u yihiin dhaqan-xumo suurtogal ah. Marka hore, la xiriir cidda lagala xiriirayo alaab-qeybiyaha si aad uga hesho sharraxaad loona xalliyo arrimahaan. Haddii jawaabaha aad ka hesho aysan ku qancin, la xiriir Waaxda Iibka Ganacsi ee Hormel Foods ama Waaxda Sharciga si loo qaado tallaabooyinka xiga.

DHIGAALADA

### Si Aad Wax Dheeraad ah U Ogaato

- Siyaasadda  La Dagaalanka Musuqmaasuqa

# Uruurinta iyo Ilaalinta Macluumaadka Dhinacyada Saddexaad

Waxaan uruurinaa macluumaad badan oo kala duwan oo la xiriira kooxaha kale ee aan la shaqeeyno. Ilaalinta hantida aqooneed iyo macluumaadka xasaasiga ah ee shuraakadayada ganacsi waa inoo muhiim, waxaana u ilaalinaa si taxaddar leh oo la mid ah sida aan u ilaalino macluumaadkayaga. Uruurinta xogta loollan ayaa ah dhaqan ganacsi oo sharci ah. Waxaan u helnaa xogtan si sharci ah oo anshax leh – marnaba kuma helno qaab is-daba-marin, been abuur ama khiyaano ah.

## SU'AAL KU SAABSAN XAALAD DHAB AH

**S Waxaan kaqaybgalay shir ganacsiyeed halkaasoo aan dhulka ka qaaday dukumiinti u muuqday inuu yahay qorshaha istaraatiijiyadeed ee sannadka soo socda ee cida nala tartanto. Waxaan doonayay inaan u celiyo cida nala tartanta, laakiin shirkii ayaa dhammaaday mana jirin qof ka socda shirkadda oo joogay. Marka guriga ayaan u qaatay, waan iska ilaaliyay inaan akhriyo, kadibna waan googooyay. Taasi ma ahayd waxa saxda ah ee aan sameyn lahaa?**

J Haa, waxaad samaysay waxa saxda ah. Waa waxa aan rabi lahayn in dadka nala tartamayo ay sameeyaan haddii qorshahayaga istaraatiijiyadeed uu ku dhaco gacantooda. Waxa xiga ee ay tahay inaad samayso ayaa ah inaad Waaxdayada Sharciga ogeysiiso arrinta si cida nala tartanto loo ogeysiiyo xaaladda looguna sheego sida aad yeeshay.

## Samee Waxa Saxda ah

- **U keydi macluumaadka xasaasiga ah si qarsoodi ah.** Ilaali macluumaadka qarsoodiga ah iyo xuquuqda hantida aqooneed ee shuraakadayada iyo kuwa nala tartamo. Tani waxaa ku jira macluumaadka aan loo sideynin dadweynaha ee dhinacyada saddexaad ee aan la shaqeyno iyo xogta loollan sida liisaska qiimaha, xeeladaha, heshiisyada, hantida aqooneed iyo macluumaadka kale ee ganacsi ee qarsoodiga ah.
- **Adeegso keliya habab anshaxeed markaad uruurinayso xogta loollanka.** Ku tiirsanow daabacaadaha, warbixinnada falanqeeyaha, mareegaha, baraha bulshada, warbinada ganacsiyada iyo dhigaalada kale ee dadweynaha u furan si aad u soo uruuriso macluumaad. Marnaba ha ku lug yeelan tuugnimo, jaajuusnimo ama khiyaano si aad u hesho xogta loollan. Haddii aad la kulanto macluumaadkan adigoon u qasdin oo aadan ogeyn in si habboon loo soo uruuriyay iyo in kale, la xiriir Waaxda Sharciga ee Hormel Foods isla markiiba si aad u hesho hagis.
- **Ka digtoonow xigashada xogta xasaasiga ah.** Ka taxaddar macluumaadka gacanta ka geystaan tartanka suuqa inaad ka aqbasho dhinacyo saddexaad. Ogow halka ay ka soo xigteen oo hubso in macluumaadka uusan dhawreynin heshiiska shaacis la'aanta ama qarsoodiga, ama sharciyada sirta ganacsiga. Marnaba si toos ah macluumaad xasaasi ah oo innaga caawinayo tartanka suuqa ha uga aqbalin cid nala tartanto.
- **U-hoggaansan waajibaadyada qarsoodiga.** Xushmee waajibaadka dadka kale ee ah inay xafidaan macluumaadka innaga caawinayo tartanka suuqa ee ay tahay inay ilaaliyaan. Marnaba ha ku caddaadin loollame ama dhinac saddexaad inay ku xadgudbaan waajibaadyada heshiisyada shaacin-la'aanta.
- **Hadal.** U sheeg walaac kasta oo ku saabsan ilaalinta macluumaadka qarsoodiga ah ee dhinacyada saddexaad ee aan la shaqeyno ama uruurinta xogta loollan Waaxda Sharciga.

# U Horumarinta Baddeecadahayaga Si Daacadnimo Leh

Waxaa naga go'an dhaqanada xayaysiinta runta ah, iibka iyo dhaqamada suuqgeynta ee xushmad u leh macaamiishayada. Tani waxaa ka mid ah sumadaynta badeecada oo sax ah, taasoo buuxinaysa miqyaasyada dowladda oona ka turjumaysa sharafta Shirkadayada. Waa inaan had iyo jeer si sax ah oo daacad ah u bixinaa warbixinta markaan xayeysiineyno badeecadahayaga qaabka ay dooniba xayeysiintu ha noqotee, innagoo sheegayno kaliya waxyaabaha xaqiiqda ku saleysan oo la xaqiijin karo.

## Samee Waxa Saxda ah

- **Noqo qof runta sheego.** Sii macmiisha macluumaad cad oo sax ah si aad uga caawiso inay gaaraan go'aano xog ku salaysan markay wax iibsanayaan. Marnaba been ha ka sheegin badeecadahayaga hana ka been sheegin badeecadaha dadka nala tartamayo.
- **Raac sharciyada ilaaliya macaamiishayada.** Xubnaha kooxda ee ka shaqeeya iibka, suuqgeynta ama xayaysiinta waa inay hubiyaan in agabyada xayeysiinta ay u hoggaansamayaan sharciyada la xiriira macluumaadka badeecadda, qiimeynta iyo xayaysiinta isbarbardhigga ah. Summadaha badeecadahayaga waa inay u hoggaansamaan dhammaan shuruudaha dowladda iyo tilmaamaha Shirkadda ee badqabka badeecadda, nafaqada iyo tayada sare.
- **Hadal.** Haddii aad qabtid su'aal ama aad ka warqabto in lagu xadgudbay siyaasadaha xayeysiintayada, suuqgeynta, iibka ama sumadaynta badeecada, la xiriir mid ka mid ah ilaha Shirkadda dhigaalada ku jira Xeerkan.

## SU'AAL KU SAABSAN XAALAD DHAB AH

**S** **Kooxdaydu waxay naqshadaynaysaa summad badeecad oo loogu talagalay badeecad laga sameeyay doofaarka oo dib-u-habayn lagu sameeyey iyadoo in yar laga yareynayo cusbada. Qaar ka mid ah kooxda ayaa raba inay qaybta sare ee sumadda ku dhejiyaan dhegaati ay ku qoran tahay "Cusub! Cusbada ayaa ku yar" laakiin ma hubo inay taasi sax tahay. Ma sameyn karnaa?**

**J** Waa laga yaabaa. Waxaa jira miqyaasyo federaal oo loogu talagalay adeegsiga ereyada "cusbada ayaa ku yar" ee lagu qoro summada. Haddii qiyaasta cusbada ee ku jirta badeecadda cusub ay weli sareyso oo aysan buuxineyn shuruuda miqyaasyadan, waxaad awoodi kartaa inaad "cusbo hoose" ku qorto summada. Ka hubso Waaxda Sharciga ee Hormel Foods ama Ha'yadaha Sharciyeynta, Waaxda Sumadaynta iyo Qaabaynta si aad u ogaato habka habboon ee aad u sumadayneyso badeecadda.

## Ka fogaanshaha Iska hor imaaddka Danaha

Waxaa naga go'an inaan dhinac iska dhigno danahayaga gaarka ah marka ay la tartamayaan danaha Shirkadda. Tani waxaa ka mid ah inaynu jagooyinkayaga u isticmaalin faa'idadooyin gaar inoo ah ama inaanan u isticmaalin inaan ku caawino qoysaskayaga iyo asxaabtayada. Haddii aad ku jirto xaalad keenayso in danahaaga shaqsiyeed iyo kuwa shirkadda iska hor imaanayaan, waa inaad shaacisaa.

### WAXA UU KA DHIGAN YAHAY

### Iska hor imaadka danaha

*Iska hor imaadka danaha* ayaa dhaca marka duruufahaaga shaqsiyeed ay soo farageliyaan, ama u muuqdaan inay faragelin ku sameynayaan, awoodda aad ku gaari karto go'aanno abaarayo maslaxada Shirkadda. Tani waxay dhacdaa marka adiga, saaxiibkaaga dhow ama xubin qoyskaaga ka mid ah aad kasbataan faa'iido, dhaqaale ama wax kale iyadoo sabab u tahay go'aankaaga. Ku guuldareysiga inaad adeegsato go'aan wanaagsan markay xaaladani dhacdo ayaa dhaawici karta kalsoonida dadweynaha ay ku qabaan Shirkadayada, waxayna taasi dhaawaceysaa awoodda aan u leenahay inaan u adeegno macaamiishayada.

OGOW

## TUSAALOOYINKA ISKA HOR IMAADKA DANAHA

**Xaalado badan ayaa abuuri kara iska hor imaad dano. Ma wada tixi karno dhammaantood, laakiin waa kuwaan tusaalooyin ka mid ah noocyada ugu badan:**

- **Xiriirrada shaqsiyeed** sida xubin qoyskaaga ka mid ah, shukaansiga ama xiriir dhow la yeelashada shuraako ganacsi, cid nala tartameyso, macmiil ama xubin kooxda ka mid ah kaasoo aad adiga mas'uul ka tahay waxqabadkiisa.
- **Shaqooyinka dibadda ah** ama xiriirada, badanaa kuwa lala yeesho shuraakada ganacsiga, cid nala tartameyso ama macaamiisha.
- **Maalgashiyo shaqsiyeed** oo aad u badan oo saamayn ku yeelan kara ama u muuqda inay saamayn ku yeelan karaan go'aanadaada ganacsiga.
- **Fursado ganacsi** oo aad ogaatay inta aad ku jirtay shaqada Shirkadda kuwaasi oo aad danahaaga shaqsiyeed u raadsaneyso beddelkii aad mudnaanta siin lahayd danaha Shirkadda.
- **Xubinnimada guddiga** shirkad kale, ha ahaado mid ganacsi ama mid aan macaash doon ahayn, haddii xiriirka abuuri karo wax u muuqdo iska hor imaad inuu ku yahay hawlgaladayada.

## GOORTA AY TAHAY INAAD DIB U-TIXGELISO XIRIIRADAADA

**Waxaa jira waxyaabo caadiyan kiciyo oo sababi kara in xubnaha kooxda ay qiimeeyaan xiriirkooda si looga fiirsado iska hor imaadka danaha. iska hor imaadka ayaa dhici kara marka:**

- **Aad ku cusub tahay Shirkadda.**
- **Aad jago cusub ka qabato Shirkadda dhexdeeda.**
- **Xubin kooxda ka mid ah uu qayb ka yahay habka xulashada dhinacyada saddexaad ee adeeg bixiyayaasha ah.**
- **Saaxiibkaaga kugu dhow ama xubin qoyskaaga ka tirsan uu shaqo ka hela shirkad ganacsi la sameyso Shirkadda.**
- **Waxaa jira ganacsi wadaag, midow ama iibsi ganacsi.**
- **Isbeddello istaraatiijiyadeed ayaa ka dhaca gudaha shirkadda.**



## Samee Waxa Saxda ah

- **Noqo qof firfircoon.** La soco xaaladaha abuuri kara iska hor imaadka danaha kana fogow, haddii ay suurtogal tahay. Haddii aadan ka leexan karin iska hor imaadka danaha, kala hadal kormeerahaaga ama Waaxda Sharciga.
- **Yeelo Ujeeddo.** Adeegso go'aan wanaagsan hana oggolaan wax farageliyo awoodaada aad ku gaari karto go'aano ay ku jiraan danaha Shirkadda. Ha ku abaalmarin ganacsi qof kuu dhow ama shirkad uu leeyahay qof aad xiriir shaqsiyeed la leedahay. Ha ka qaybqaadan dib-u-eegista dalabyada noocaas ah.
- **Hadal.** Kormeerahaaga ama cid kale oo lagu sheegay Xeerkan kala hadal xaalad kasta oo laga yaabo inay adiga ama qofka kula shaqeeya gelineyso iska hor imaadka danaha, oo ay ku jiraan xaalado abuuraya wax u muuqda iska hor imaadka danaha. Shaacintu kama dhigno in la mamnuuci doono. Badanaa iska hor imaadka danaha ee iman kara ayaa wax laga qaban karaa lana xallin karaa.

### SU'AAL KU SAABSAN XAALAD DHAB AH

**S** **Walaashay ayaa waxay leedahay beer yar oo ay ku koriso kuna iibiso doofaaro tayo leh iyadoo ku bixinayso qiimo dhexdhexaad ah. Ma u gudbin karaa magaceeda asxaabteyda sameeyaan xulashada alaab-qeybiyeyaashaan ee Hormel Foods?**

**J** Shirkaddu waxay had iyo jeer raadineysaa shuraako ganacsi oo aad u fiican, walaashaa ayaa laga yaabaa inay buuxineyso shuruudaha. Waa sax in magaceeda aad soo gudbiso, laakiin kama mid noqon kartid habka xulashada. Sidoo kale, haddii aad tahay hoggaamiye Shirkadeed, ogow in soo-jeedintaada laga yaabo in loo arko inay tahay amar ah in iyada la siiyo qandaraaska. Ka taxaddar oo yaa lagaa arkin fikirkani. Intaas waxaa dheer, cadee inay tahay khasab inay u tartanto ganacsiga.

DHIGAALADA

## Si Aad Wax Dheeraad ah U Ogaato

- Siyaasadda Iska Hor Imaadka Danaha iyo Foomka Shaacinta

# Bixinta iyo Qaadashada Hadiyadaha iyo Ixsaan-falyada

Hadiyadaha caadiga ah oo aan had iy jeer la bixin iyo isxaan-falyada ganacsi ayaa waxay noqon karaan tilmaamo habboon oo muujinayo niyad-wanaag waxayna gacan ka geysan karaan dhisidda xiriirro. Si kastaba, mararka qaarkood hadiyadaha noocan oo kale ah ayaa caqabad ku noqon kara ujeeddada ganacsi. Marnaba waa inaan lagu siin ama la aqbalin si ay saameyn ugu yeeshaan go'aan ganacsi ama go'aan sharciyeyn waana inaysan marnaba noqon kuwa xad-dhaaf ah ama joogto ah. Isxaan-falka ayaa u muuqan kara sida iska hor imaadka danaha ama xitaa laaluush sharci-darro ah mararka qaarkood. Waxaan had iyo jeer ku dadaalnaa inaan tixgelinno anshaxa isxaan-fal kasta oo ganacsi si aan u ilaalino sumcadda wanaagsan ee Shirkadda oo aan si wanaagsan ugu adeegno macaamiishayada.

**WAXA UU KA DHIGAN YAHAY**

## Hadiyadaha Ganacsi

*Hadiyadaha ganacsi* waa sheeyaal ama adeegyo ganacsiga qiimo leh oo la siiyo ama laga aqbalo qof la shaqeeya Shirkadda ama doonaya inuu la shaqeeyo shirkadda mustaqbalka. Isxaan-falyadaan waxaa ka mid ah hadiyadaha, u roonaanshaha, safarka iyo mararka qaarkood xitaa hawl bulsheed ama tilmaamo naxariis leh. Tusaalooyinka waxaa ka mid ah cuntooyinka, dhacdooyinka isboortiga, dhacdooyinka masraxeed, soodhaweynta iyo munaasabadaha bulsheed ee uu kafaalo qaaday ama uu martigeliyay bixiyaha. Xitaa cunto ama cabitaan yar ayaa loo tixgelin karaa inuu yihiin isxaan-fal.

OGOW

**WAXA LA AQBALI KARO** **Hadiyadaha la aqbali karo waa inay ahaadaan:**

- **Qiimo ahaan caadi, wax aan ka badnayn USD $100 hadiyad kasta.**
- **In ka yar USD $250 wadar ahaan hadiyada laga heli kara hal qof sanadkiiba.**
- **Kuwa habboon, aan ahayn sharci-darro ama meel-ka-dhac.**
- **Kuwa waafaqsan siyaasadaha Shirkadda iyo dhaqammada caadiga ah.**
- **Kuwa xor ka ah rajada ah in qofka bixinayo uu wax ku helo.**

## Samee Waxa Saxda ah

- **Dhowr siyaasadaha.** U hoggaansan siyaasadahayaga iyo kuwa shirkadda qaataha marka aad bixinayso ama aqbalayso hadiyad ganacsi. Maaweelo ganacsi ama mid caadi ah ayaa la oggol yahay in lala sameeyo alaab-qeybiyeyaasha, macaamiisha iyo dadka kale ee la shaqeeya Hormel Foods haddii ay la jaanqaadayso siyaasadaha Shirkadda iyo dhaqammada caadiga ah.
- **Diid isxaan-falada loogu talagalay inay saamayn kugu yeeshaan.** Lama oggola in la bixiyo ama la aqbalo hadiyad ama u roonaansho ku lug leh qof ganacsi la sameeyo Shirkadda haddii ay saamaynayso ama loogu talagalay inay saamayso go'aan ganacsi. Iska ilaali xitaa waxyaabaha yeelan kara muuqaal saamayn. Tusaale ahaan, marnaba ha weydaarsan wax isxaan-falid ah inta lagu guda jiro hawsha u tartanka ganacsi.
- **Marnaba ha bixin hana aqbalin lacag caddaan ah ama wax u dhigmo lacag caddaan ah.** Tani waxaa ku jira kaararka hadiyadda, iyadoon la eegayn qiimaha kaarka. Kuwaan waxaa loo tixgeliyaa inay yihiin kuwo u dhigmo lacag caddaan ah.
- **Diid hadiyadaha ay cadahay inaysan habboonayn.** Tani waxay kuu noqon kartaa mid adiga kugu adag ama meel-ku-dhac ku ah hadiyad-bixiyaha, laakiin marka isxaan-falka uu yahay mid aan habboonayn (tusaale ahaan, casho loo aado goobta madadaalada dadka waaweyn), waa inaad si xushmad leh u diido.
- **Ka taxaddar saraakiisha dowladda.** Markaad la shaqaynayso sarkaal dowladeed, waa inaad raacdaa dhammaan qawaaniinta deegaanka iyo kuwa dowladda ee khuseeya isxaan-falada ganacsi, iyo sidoo kale siyaasadda Hormel Foods. Waxaa muhiim ah in lala tashado Waaxda Sharciga ama Waaxda Anshaxa iyo U-hoggaansanaanta kahor inta aadan hadiyad bixinin ama madadaalo u fidin sarkaal dowladeed.
- **Hadal.** Codso hagis marka aadan hubin waxa ay tahay inaad sameyso. La tasho kormeerahaaga ama Waaxda Anshaxa iyo U-hoggaansanaanta haddii aad qabtid su'aal ama walaac ku saabsan xaalad ku lug leh isxaan-fal.

## Su'aalo ku saabsan Isxaan-falada

| Ma Aqbali Karaa Isxaan-fal? | Jawaabtu waa... |
|---|---|
| Ugu casumida munaasabad isboorti oo xirfadeysan marti ahaan alaab-qeybiye kaqeybgalaya munaasabadda. | **Haa.** Tani waa madadaalo ganacsi ama mid caadi ah waxayna la jaanqaadaysaa dhaqammada caadiga ah ee Shirkadda. Si kastaba ha noqotee, haddii qiimaheedu yahay USD $100 ama ka badan oo uusan alaab-qeybiyuhu kaqaybgalin, waxaa loo tixgelinayaa inay tahay hadiyad aan la aqbali karin. |
| Kaarka hadiyadda ama abaalmarinada lagu guuleysto ee bakhtiyaanasiibka lagu qabto shirarka ganacsi. | **Haa.** Abaalmarin ama kaar hadiyadda ee lagu guuleysto ee bakhtiyaanasiibka looma arko inay tahay hadiyad saamayn kugu yeelan karta waana la aqbali karaa. |
| Hadiyado dhowr ah oo qiimahoodu aad u yar yihiin oo laga helo hal qandaraasle sannad gudahiisa kuwaasoo wadar ahaan qimahoodu ka badan yahay $250. | **Maya.** Taasi waxaa loo arkaa inay tahay hadiyad qaali ah. Shaksi shuraako ganacsi la ah shirkadda ayaa wuxuu bixin karaa keliya hadiyad wadar ahaan qiimahoodu yahay $250 sanadkiiba. |
| Tigidhada tiyaatarka oo qiimahoodu wadar ahaan yahay USD $80 oo laga helo macmiil aan ka soo qaybgaleynin. | **Haa.** Hadiyada ka yar $100 waa mid qiimaheedu yar yahay waana la aqbali karaa. Macmiilku khasab ma ahan inuu yimaado. |
| Socdaalka iyo hudheelka uu bixiyo alaab-qeybiye laga yaabo in mustaqbalka uu la shaqeeyo shirkadda si loo booqdo xaruntiisa iyo aagiisa wax-soo-saarka. | **Maya.** Haddii horay ay u ansixisay Hormel Foods, Shirkadda ayaa bixin doonta kharashaadka safarkan. |
| Dambiil weyn oo ay ku jiraan miraha xiliyada fasaxa, farmaajo iyo buskudyo oo ka timid iibiye una muuqato in qiimaheedu ka badan yahay USD $100. | **Haa.** Hadiyadaha dhakhso halaaba ee aan la celin karin waa la haysan karaa haddii lala wadaago dadka kale ee jooga waaxdaada. Si kastaba ha ahaatee, haddii tani ay qayb ka tahay hadiyado taxane ah oo qiimahoodu ka badan yahay USD $250 oo ka yimid isla iibiyaha, markaas waa in la diido. |



DHIGAALADA

## Si Aad Wax Dheeraad ah U Ogaato

- Siyaasadda La Dagaalanka Musuqmaasuqa
- Siyaasadda Safarka Ganacsi
- Siyaasadaha iyo Habraacyada Safarka Shirkadda
- Siyaasadda Warbixinta Kharashka
- Siyaasadaha Hadiyadaha, Abaalmarinada iyo Deeqaha

# U-HEELANAANTAYADA INAAN ILAALINO SHIRKADDAYADA

**Magaca wanaagsan ee Shirkadayada wuxuu ka dhashay sumcadda daacadnimo ee nalagu yaqaano. Go'aan kasta oo ganacsiga khuseeya oo uu gaaro xubin kasta oo kooxda ka mid ah waa inuu taageera hadafkan, waana in dhammaan xubnaha kooxdu ay dhinac iska dhigaan faa'iidooyinka khaaska u ah oo ay xooga saaraan faa'iidada Shirkadda.**

## Dhawrista Daacadnimadayada Maaliyadeed

Mid kasta oo inaga mid ah wuxuu kaalin ka qaataa xoojinta wanaaga maaliyadeed ee Shirkadda. Maadaama aan nahay shirkad dadweynaha ay la ganacsan karaan, waxaan leenahay shuruudo, xeerar iyo qawaaniin ay maamulaan Guddiga Ganacsiga Saamiyada iyo Sarifka ee Maraykanka (US Securities and Exchange Commission, SEC) iyo Suuqa Saamiyada ee New York (New York Stock Exchange). Waxaan ku tiirsannahay siyaasadaha hanti-dhowrka, xakameynada gudaha iyo hababka shaacinta si aan u xaqiijino saxsanaanta dukumentiyadayada maaliyadeed. Waxaa lama huraan ah in diiwaanadayada la siiyo dadweynaha iyo shaacintayada la siiyo maalgashadayaasha ay yihiin kuwo sax ah, dhammaystiran oo la fahmi karo. Waxaan hufnaantayada maaliyadeed ku ilaalinaa go'aankayaga wanaagsan iyo ficiladayada anshaxa leh.

OGOW

### WARBIXINTA DOWLADEED

**Dowladaha iyo wakaaladaha suuqa saamiyada, kuwa jooga gudaha Maraykanka iyo kuwa Maraykanka ka baxsanba, waxay leeyihiin shuruudo gaar ah oo ku saabsan warbixinnada iyo diiwaanada ay soo gudbiyaan shirkadaha. SEC iyo Adeegga Dakhliga Gudaha ee Mareykanka ayaa ah tusaale ka mid ah wakaaladahaan.**

**Agaasimayaasha iyo xubnaha kale ee kooxda ee diyaariya, kormeera, dib-u-eego ama xaqiijiya warbixinnadaan iyo diiwaanadaan waa inay xaqiijiyaan inay soo-gudbinadoodu ay yihiin kuwa sax ah, dhammaystiran oo lagu kalsoonaan karo. Sidoo kale waa inay u hoggaansamaan dhammaan siyaasadaha warbixinada iyo shaacinta dowladeed ee la xiriira Shirkadayada. Khaladaadka ayaa waxay lahaan karaan cawaaqib weyn. Qof kasta oo ogaado macluumaad saamayn ku yeelan kara saxnaanta diiwaanada ama shaacinada guud ee Shirkadda waa inuu si dhakhso ah ula Hadlaa Sarkaalka U-hoggaansanaanta ee Hormel Foods.**

DHIGAALADA

## Si Aad Wax Dheeraad ah U Ogaato

• Siyaasadda Is-waafajinta Dheelitirka Xisaabta

## Samee Waxa Saxda ah

- **Faham mas'uuliyadaada ku aaddan hufnaanta maaliyadeed.** Haddii aad maareyso hantida shirkadda, kharashaadka, miisaaniyadda, bayaannada maaliyadeed, diiwaanada ama warbixinada dowladda, xaqiiji inaad u maareyso si taxaddar leh, sax ah oo daacadnimo ah.
- **Raac dhammaan shuruudaha sharciga iyo xakameynada maaliyadeed.** Bixi macluumaad dhammeystiran, sax ah, waqtiyeysan oo hufan. U hoggaansan xakameynada iyo siyaasadaha iyo habraacyada maaliyadeed, xisaabaadka iyo hanti-dhowrka.
- **Xaqiiji in is-weydaarsiyada maaliyadeed iyo iibka si sax ah loo diiwaangeliyey.** Dukumentiyo habboon waa inay taageeraan dhammaan is-weydaarsiyada maaliyadeed. Waa in la diiwaangeliyaa xilli xisaabeedka saxda ah iyo koontada saxda ah. Ha isku dayin inaad xili hore ama goor dambe diiwaangeliso si aad u buuxiso miisaaniyada.
- **Ixtiraam geedi-socodyada hanti-dhowrka.** La shaqee hanti-dhawreyaasha, kuwa gudaha iyo kuwa dibaddaba.
- **Dhakhso soo sheeg khaladaadka ama walaacyada.** Sida ugu dhaqsaha badan uga hadal wixii khaladaad ah ama is-daba-mar ah ee ka jira diiwaanada maaliyadeed, xisaabaadka ama hanti-dhowrka.

### SU'AAL KU SAABSAN XAALAD DHAB AH

**S** **Kormeerahaygu ayaa iga codsaday inaan qoro isweydaarsi maaliyadeed oo u muuqda inuu khaldayo qiimaha hantida ee ku qoran buugaagtayada. Ma inaan sameeyaa waxa kormeerahaygu iga codsaday?**

**J** Maya. Inaad adigoo og khalado qiimaha hantida ayaa si cad u ah mid aad daacad ka ahayn waxayna noqon kartaa khiyaano. Marka hore, kala hadal kormeerahaaga waxa aad ka walaacsan tahay. Isaga ama iyada ayaa laga yaabaa inuu khalad sameeyay. Haddii tani ay dhib kugu tahay, ama haddii kormeerahaagu isku dayo inuu qiil u yeelo codsiga, u gudbi walaacaaga mid ka mid ah ilaha Shirkadda ee ku xusan Xeerkan. Waa in laga fogaado ama la saxo khaladaadka ku jira diiwaanadayada maaliyadeed.

# Maareynta Buugaagtayada iyo Diiwaanadayada

Diiwaanada iyo dukumiintiyada shirkaddu waxaa laga sameeyaa taariikhda dhaqdhaqaaqyadayada ganacsi. Maalgashadayaasha, macaamiisha, shurakada ganacsi, saraakiisha dowladda iyo dadka nala shaqeeya waxay ku tiirsan yihiin saxnaanta buugaagtayada iyo diiwaanadayada. Diiwaanada hawlgalka, maaliyadda iyo ganacsiga waa inay noqdaan kuwo run ah, dhammaystiran oo lagu kalsoonaan karo si ay arrimaha ganacsigayaga uga bixiyaan sawir la isku hallayn karo.

## SU'AAL KU SAABSAN XAALAD DHAB AH

**S Mid ka mid ah dadka ila shaqeeyo ayaa si joogto ah u soo gudbiya warbixinnadiisa kharashka kadib taariikhda la rabo, waxaana arkay isagoo samaynaya dukumentiyo uu qiil uga dhigayo kharashaadka qaarkood. Kormeerahayaga miyaa mas'uul ka ah qabashada waxyaabahan?**

J Haa iyo maya. Kormeerahaaga ayaa ugu dambayntii mas'uul ka ah dib-u-eegista warbixinnada kharashka ee xubnaha kooxda, laakiin haddii aad ka warqabto soo-gudbin daahday ama aan dhammaystirnayn, dukumiintiyo liita ama rasiidyo been-abuur ah, waxay taasi calaamad u noqon kartaa khiyaano. Dhammaan khaladaadkan u soo sheeg kormeerahaaga.

## Samee Waxa Saxda ah

- **Qor xisaabaad iyo diiwaano lagu kalsoonaan karo.** Si habboon u diiwaangeli dhammaan hantida, deymaha, dakhliga iyo kharashaadka adigoo adeegsanaya habraacyada Shirkadda. Dhammaan diiwaanada Shirkadda waa inay si run ah u sharaxaan is-weydaarsiyada maaliyadeed ama waxyaabaha lagu qoro, ha ahaadaan kuwo warqad ah ama qaab elektaroonig ah.
- **Raac siyaasadahayaga maareynta iyo haynta dukumiintiyada.** Waa inaad haysaa noocyo ka mid ah diiwaanada, caadiyan muddo cayiman. Siyaadahayaga iyo habraacyadayaga ayaa qeexaya dukumentiyada ay tahay in la hayo, muddada ay tahay in la hayo, goorta la burburin karo iyo sida loo tuurayo.
- **U hoggaansan xiliga haynta dukumiintiyada sharci.** Diiwaanada la xiriira dacwadaha maxkamadeed, hanti-dhowrka ama baaritaanada ayaa laga yaabaa inay u baahdaan in la hayo muddo ka badan wakhtiga lagu sheegay siyaasaddayada. Markay tani dhacdo, Waaxda Sharciga ayaa soo saari doonta tilmaamo faahfaahinayo macluumaadka ay tahay in la hayo oo la heli karo ilaa xiliga haynta ka dhamaado. Marnaba wax ha ka beddelin hana burburin dukumiintiyada loo hayo ujeeddo sharciyeed.
- **Hadal.** Weydii su'aal ama sheeg walaacaaga haddii aad u malaynayso in diiwaanka ganacsiga uusan sax ahayn, lagu kalsoonaan karin ama in si aan habbooneyn loo hayo.

DHIGAALADA

## Si Aad Wax Dheeraad ah U Ogaato

- Siyaasadda La Dagaalanka Musuqmaasuqa
- Muuqaalka Been-abuurka Dukumiintiyada
- Siyaasadda Maareynta Diiwaanada iyo Macluumaadka (RIM)
- Jadwalka Haynta Diiwaanada



WAXA UU KA DHIGAN YAHAY

## Diwaanada Ganacsiga

*Diiwaanada ganacsi* waxaa ku jira dukumiintiyo kala duwan, sida warbixinnada kharashka, bayaannada maaliyadeed, qorshayaasha suuqgeynta, bixinta qaansheegyada, diiwaanada dowladda, diiwaannada wax-soo-saarka, dib-u-eegista tayada, warbixinnada hanti-dhowrka iyo kuwo kale oo badan.

# Ilaalinta Hantida Shirkadda

Waxaa naga go'an inaan si xikmad leh u isticmaalno hantida Hormel Foods iyo inaan u isticmaalno ujeeddooyin waxtar u leh Shirkadda. Mid kasta oo inaga mid ah wuxuu mas'uul ka yahay inuu u isticmaalo hantida Shirkadda sidii loogu talagalay iyo inuu ka ilaaliyo khasaare, xatooyo, waxyeello, faataalnimo iyo adeegsi aan habboonayn.

## ILAALI NIDAAMYADAYAGA MACLUUMAADKA

- **Xaddid isticmaalka shaqsiyeed ee kumbiyuutarada iyo telefoonada Shirkadda. Hawlaha sida dukaamaysiga, hawlaha koontada bangiga iyo dib-u-eegista baraha bulshada ayaa la oggol yahay marmar, haddiiba aysan abuuraynin khatar amni ama aysan faragelinaynin waajibaadkaaga shaqo ama waxqabadkaaga.**
- **Ha u isticmaalin nidaamyada tiknolojiyadda Shirkadda ciyaaro, fariimaha dadka badan loo diro ama kaftanka, ama ujeedooyin meel-ka-dhac ah ama sharci-darro ah.**
- **Astur magacyada isticmaalaha iyo lambarrada sirta ah.**
- **Ha u oggolaan dadka kale, oo ay ku jiraan asxaabtaada iyo xubnaha qoyskaaga, inay isticmaalaan khayraadyadayaga tiknoolojiyada.**
- **Ha abuurin, ha kaydin hana dirin waxyaabo af-xumo ah.**
- **Ha furin xiriiriyeyaasha iimayl ama imayllada aan la hubin, xitaa haddii aad taqaanid qofka soo diray.**
- **Isticmaal kaliya softiweer shati habboon leh.**
- **Marnaba softiweerkaaga gaarka kuu ah ha ku shubin kumbuyuutarada, telefoonada ama qalabka kale ee Shirkadda oggolaansho la'aan.**
- **Ha filanin asturnaan markaad isticmaaleysid iimaylka, internet-ka ama tiknolojiyadda Shirkad kale. Shirkaddu waxay xaq u leedahay inay la socoto isticmaalka qalabkeeda farsamo, shabakadeeda iyo nidaamyadeeda.**

# Samee Waxa Saxda ah

- **U ilaali hantida Shirkadda sida adigoo iska leh.** Adiga ayaa ka mas'uul ah oo lagaala xisaabtami doonaa isticmalka habboon iyo ilaalinta hantida Shirkadda ee lagugu aaminay.
- **Sug amniga aaggaaga shaqo.** Ilaali xafiiskaaga, goobtaada shaqo iyo qalabkaaga shaqo adigoo xiraya alaabta ama gabi ahaanba xirayo nidaamyada marka aan la isticmaalaynin. Ku dhaqan siyaasadda miiska nadiifka ah – miiskaaga ka nadiifi dukumentiyada ganacsiga maalin kasta kahor intaadan ka tagin goobta shaqada.
- **Raadi oggolaansho.** Hel oggolaansho qoraal ah kahor intaadan deyminin, iibinin ama deeq ahaan u bixinin hantida shirkadda.
- **Hadal.** Soo sheeg dhacdooyinka la tuhunsan yahay ee xatooyada ama si xun u isticmaalka hantidayada. Sidoo kale soo sheeg qalab kasta oo waxyeelloobay, aan badqab ahayn ama u baahan dayactir.

OGOW

## TUSAALOOYINKA HANTIDA SHIRKADDA

**Waxaa jira afar nooc oo ah hantida shirkadda. Tusaalooyinka nooc kasta waxaa ka mid ah:**

- **Elektirooniga – kumbuyuutarada, aaladaha kaydinta xoga ee elektaroonigga ah, nidaamyada macluumaadka.**
- **Maaliyadda – kaararka bangiga ee shirkadda, qaansheegyada, koontooyinka bangiga, diiwaanada maaliyadeed.**
- **Macluumaadka – keydka xogta, faylalka, hantida aqooneed, hannaanka soosaarka badeecada.**
- **Hantida la taaban karo – xarumaha, qalabka, alaabta cayriinka ah, qalabka farsamo.**

## SU'AAL KU SAABSAN XAALAD DHAB AH

**S** **Waxaan maqlay maareeye leh waxaan qalab ka qaatay waaxda dayactirka ee xaruntayada si uu ugu isticmaalo guriga Sabtida iyo Axadda. Wuxuu sheegay inuu soo celiyay qalabka maalinta Isniinta. Miyaan qof kale u sheegaa arrintaan?**

**J** Haa, waa inaad Hadashaa. Khayraadka Shirkadda, sida qalabka farsamo iyo qalabka, waxaa si gaar ah loogu talagalay inay xubnaha kooxdayada siiyaan jawi shaqo oo badqab leh oo sugan. Waa inaad islamarkiiba kala hadashaa kormeerahaaga waxa aad maqashay.

DHIGAALADA

## Si Aad Wax Dheeraad ah U Ogaato

- Tilmaamaha Ilaalinta Xogta
- Siyaasadda Amniga Ganacsiga
- Tilmaamaha Amniga ee Kumbuyuutarka Laabtoobka ah
- Siyaasadda Telefoonka Gacanta

# Ilaalinta Macluumaadka Shirkadda ee Qarsoodiga ah

Mid ka mid ah hantida ugu qiimaha badan ee Hormel Foods waa macluumaadka qarsoodiga ah ee shirkadayada, oo ay ku jirto hantida aqooneed. Wuxuu waajib naga saaran yahay inaan sugno amniga macluumaadkan oo aan ka ilaalino lumis, si xun u isticmaal iyo helid iyo shaacin aan habboonayn.

**WAXA UU KA DHIGAN YAHAY**

### Macluumaadka Xasaasiga ah ee Shirkadda

*Macluumaadka Qarsoodiga ah ee Shirkadda* waa macluumaad kasta oo la xiriira ganacsiga Hormel Foods ee aynan heli karin dadweynaha, iyadoon la eegayn xaddidaadaha heilda, isticmaalka ama shaacinta.

*Hantida aqooneed* waa hal nooc oo ka mid ah macluumaadka qarsoodiga ah. Waxay noqon kartaa fikrad, naqshad, hal-abuur, wax-ka-beddel fiican ama fikrad kale oo ay leedahay Shirkadda.

OGOW

### TUSAALOOYINKA MACLUUMAADKA QARSOODIGA AH EE SHIRKADDA

**Dhammaan macluumaadkayaga qarsoodiga ah laguma tixi karo halkan, laakiin tusaalooyinka qaarkood waa:**

- **Hababka wax-soo-saarka.**
- **Wadahadalada midowga iyo iibsiga.**
- **Xogta shaqaalaha.**
- **Hannaanada soosaarista badeecadaha.**
- **Macluumaadka iibka.**
- **Siraha ganacsi.**
- **Macluumaadka maaliyadeed ee aan la shaacin.**

## Samee Waxa Saxda ah

- **Ogow waxa qarsoodiga ah.** Xogta xasaasiga ah ee ay leedahay Shirkadda ayaa mararka qaarkood lagu calaamadeeyaa inay tahay qarsoodi, laakiin had iyo jeer ma ahan. Waa inaad awooddaa inaad aqoonsato agabyada qarsoodiga ah markaad eegto ama maqasho.
- **Dhowr siyaasadahayaga.** Hel oo u isticmaal macluumaadka qarsoodiga ah kaliya ujeeddooyin ganacsi oo sharci ah, oo xafid marka aan la isticmaalaynin. Kaliya ula wadaag dadka idman sababo shaqada la xiriira ama haddii sharcigu dhigayo inaad la wadaagto. Ka taxaddar oo ka fogow inaad uga hadasho meelaha laga yaabo in lagu maqlo. Haddii aad hayso macluumaadkan, waa inaad ku soo wareejisaa Shirkadda markii lagaa codsado ama marka shaqada lagaa joojiyo.
- **Shaaci waxyaabaha aad abuurtay.** Hal-abuur, horumarin, naqshad ama wax-ka-beddel kasta oo fiican oo aad abuurto oo la xiriira ganacsiga ama cilmi-baarista Shirkadda waa in si qoraal ah loogu shaaciyo Shirkadda. Inta badan, waxay noqon doontaa hanti aqooneed oo gaar u ah Shirkadda. Haddii aad abuurtay waqtiyada aad shaqada ku jirin, adigoo aanan isticmaaleynin kheyraadka Shirkadda oo aysan la xiriirin ganacsiga ama cilmi-baarista Hormel Foods, markaa Shirkadda ma lahaan doonto.
- **Isticmaal aaladaha la oggol yahay.** Dhammaan kumbuyuutarrada iyo aaladaha kale, oo ay ku jiraan aaladaha kaydinta (tusaale ahaan, aaladaha USB-ga) ee loo isticmaalo in lagu kaydiyo ama lagu galo macluumaadka qarsoodiga ah waa in laga helaa Waaxda Tiknoolijiyada Macluumaadka ee Shirkadda ama waa in la oggol yahay in la isticmaalo.
- **Ilaali macluumaadka dadka kale.** Qiimaha shuraakada ganacsi, heshiisyada iyo xogta kale ee xasaasiga ah waa in loo maareeyaa si badqab ah oo la mid ah sida loo maareeyo xogtadaya. Sidoo kale, si xun ha u isticmaalin hantida aqooneed ee dadka kale, sida softiweerka.
- **Soo sheeg si xun u isticmaalka, luminta iyo shaacinta.** Si dhakhso leh ula Hadal kormeerahaaga ama il kale oo Shirkadeed haddii aad aaminsan tahay in macluumaad qarsoodi ah si khaldan loo maareeyay, la xaday ama lumay.



## SU'AAL KU SAABSAN XAALAD DHAB AH

**S** **Waxaan si joogto ah ugu shaqeeyaa macluumaadka qarsoodiga ah ee Shirkadda. Ma la wadaagi karaa qof kale oo ka shaqeeya Hormel Foods?**

**J** Maya. Waxaad la wadaagi kartaa macluumaadkan keliya xubnaha kale ee kooxda ee u baahan inay helaan si ay shaqadooda u qabtaan. Shardigani wuxuu si gaar ah muhiim u yahay in la xasuusto marka lagu shaqaynayo noocyada macluumaadka qarsoodiga ah ee ugu xasaasisan.

DHIGAALADA

### Si Aad Wax Dheeraad ah U Ogaato

- Siyaasadda Kala-soocida Xogta
- Siyaasadda Asturnaanta ee Gudaha Shirkadda
- Siyaasadda Baraha Bulshada ee Loo Adeegsado Ganacsiga

## Si Sharci ah Uga Ganacsiga Saamiyada iyo Maalgashiga Saamiyada Kale

Inta aad ku jirto shaqadaada, waxaa laga yaabaa inaad la kulanto agab macluumaad oo ku saabsan Shirkaddayada ama shirkad kale oo dadweynaha u furan oo aan si guud aysan u heli karin dhammaan maalgashadayaasha. Macluumaadkan ayaa laga yaabaa inuu qiimo u leeyahay saamileyda, maxaa yeelay wuxuu saamayn ku yeelan karaa go'aankooda ah inay iibsadaan ama iibiyaan saamiyada shirkadda. Ka ganacsiga saamiyada ama maalgashiga saamiyada kale iyadoo lagu saleynayo macluumaadkan waxaa loo yaqaan ka ganacsiga xogta gudaha, waana sharci-darro.

### WAXA UU KA DHIGAN YAHAY

#### Macluumaadka gudaha ama xogta gudaha

waa macluumaad muhiim ah, aan loo shaacin dadweynaha oo ku saabsan shirkad dadweynaha ay la ganacsadaan kaasoo maalgashade siin kara faa'ido maaliyadeed marka uu iibsanayo, iska iibinayo, ama uu haysanayo saamiyadaha ama dammaanadaha kale.

#### Macluumaadka muhiimka ah

waa macluumaad muhiim u ah maalgashade go'aan ka gaaraya iibsashada, iska iibinta ama haysashada saamiyada shirkadda. Guud ahaan, marka macluumaadkan loo shaaciyo dadweynaha, waxay saamayn ku yeelanaysaa qiimaha saamiyada shirkadda. Tusaalooyinka waxaa ka mid ah macluumaadka midowga ama iibsiga shirkaddaha, dib u soo celinta badeecadaha, isbeddelada lagu sameeyo maamulka fulinta, natiijooyinka dakhliga iyo weydiimaha dowladda.

#### Macluumaadka aan dadweynaha loo shaacin

wuxuu noqonayaa mid dadweynaha ay haystaan marka si weyn loogu faafiyo meel ka baxsan Shirkadda iyadoo la adeegsanayo daabacaadaha ama warbixinnada SEC.

## Samee Waxa Saxda ah

- **Faham oo raac sharciga iyo siyaasaddayada. Marna ha iibsan ama ha iibin saamiyada, curaarta, fursadaha saamiyada ama dammaanadaha Hormel Foods ama shirkad kasta oo dadweynaha u furan adigoo ku salaynayo macluumaadka dadweynaha ka qarsoon ee aad adiga ogtahay oo ku saabsan shirkaddaas**. Tani waa sharci-darro.
- **Ha ogeysiin dadka kale macluumaadka.** Marnaba macluumaadka ka qarsoon dadweynaha ha la wadaagin asxaabtaada ama xubnaha qoyskaaga adigoo rabo inay ka ganacsadaan saamiyada iyadoo lagu saleynayo macluumaadka. Sidoo kale tani waa sharci-darro.
- **Hadal.** Haddii aadan hubin in shay yahay macluumaad muhiim ah oo aan dadweynaha loo shaacin, ha la wadaagin dadka kale hana ka ganacsan saamiyada adigoo ku saleynayo macluumaadkan. Ka raadso hagis kormeerahaaga ama Waaxda Sharciga kahor intaadan qaadin wax tallaabo ah.

DHIGAALADA

### Si Aad Wax Dheeraad ah U Ogaato

- Siyaasadda Ganacsiga Xogta Gudaha ee Hormel Foods Corporation



# Ka Taxadarida Wadaxiriirka

Mar kasta oo aan la xiriirayno dadka kale ee ka baxsan Shirkadayada, waxay na siinsaa fursad aan ku xoojinno sumcadda badeecadahayaga. Taasi waa mid ka mid ah sababaha aan u xaqiijino in wadaxiriiradayada hadalka ah iyo kuwa qoraalka ah ee aan la leenahay macaamiisha, shuraakada ganacsi iyo xubnaha dadweynaha ay yihiin kuwa xirfad ku salaysan, sax ah oo run ah. Had iyo jeer taxaddar gaar ah samee markaad qorayso wax kasta oo ka soo muuqan doona warbaahinta elektiroonigga ah ama lagu diri doono iimayl. Marnaba ha ku hadlin magaca Shirkadda haddii aan laguu oggolaan inaad sidaas samayso.

OGOW

## ISTICMAALKA BARAHA BULSHADA

- **Markaad wax soo dhigeyso baraha bulshada isticmaal magacuyuulada matalayo qofka hadlayo (aniga) oo isticmaal cinwaankaaga iimaylka ee gaarka ah.**
- **Haddii aad baraha bulshada ku sheegto Hormel Foods, sheeg inaad tahay shaqaale ka tirsan Shirkadda.**
- **Waxaad sharci ahaan mas'uul ka tahay wax kasta oo aad ku qorto ama soo dhigto onlaynka.**
- **Siideynta macluumaadka asturan ee ganacsiga ayaa waxaa adiga iyo Shirkaddaba idin kaga imaan karto dhibaato sharciyeed.**
- **Xeerkayaga iyo siyaasadahayaga Shirkadda ayaa lagu dabaqaa baraha bulshada iyo onlaynka.**
- **Waxaa laguu edbin karaa wax aad soo dhigtay onlaynka oo ah sumcad-dilid, dhibaateyn ganacsi, ama sharci-darro ah, iyo sidoo kale dhaqan kasta oo kale oo aan habboonayn oo onlaynka ka sameso kaasoo saamayn xun ku yeelanayo Shirkadda.**

DHIGAALADA

## Si Aad Wax Dheeraad ah U Ogaato

- Siyaasadda Baraha Bulshada
- Siyaasadda Baraha Bulshada ee Loo Adeegsado Ganacsiga



# Samee Waxa Saxda ah

- **Si xushmad iyo daacadnimo leh ula xiriir dadka kale.** Ka fikir waxa aad sheegi rabto kahor intaadan hadlin ama aadan wax qorin, oo had iyo jeer ka fikir. Marnaba ha ku lug yeelan hawl onalyn ama iimayl taasoo aadan aqbali lahayn shaqsi ahaan. Waxyaabaha lagu soo bandhigo onlaynka waxaa si weyn u akhrin kara dadka nala tartamo, shaqo-doonayaasha, hay'adaha sharciyeynta iyo dad kale oo laga yaabo inay ka soo horjeedaan danahayaga. Qoraallada iyo iimaylada onlaynka ah waa in loo qoraa si xirfadaysan oo si cad u muujinayso ujeeddadaada. Isticmaal erayo aan si khaldan loo fahmi karin. Taxaddar la'aanta sida aad wadaxiriirka u sameyso ayaa waxay dhibaato weyn u geysan kartaa Shirkadda.
- **Ilaali macluumaadka Shirkadda.** Marnaba macluumaadka qarsoodiga ah ee shirkadda ha soo dhigin baraha bulshada ama marka aad ka jawaabeyso qoraallada la xiriira shirkadda haddii macluumaadku yahay mid aan la siidayn. Macluumaadka xaddidan, sida lagu qeexay siyaasadda kala-soocidda xogta, ha ku dirin iimayl adigoo aan haysan oggolaansho iyo qalab-ilaalin oo habboon.
- **Ka taxaddar sida aad isku muujiso.** In laguu oggolaado mooyee, marnaba ha muujin aragti ah inaad ku hadlayso magaca Shirkadda.
- **Soo gudbi codsiyada lagu raadsanayo macluumaadka.** Waxaa muhiim inoo ah inaan lahaano hal go'aan oo joogto ah markaan ku hadlayno magaca Shirkadda. Taasi waa sababta ay tahay inaad dhammaan codsiyada lagu raadsanayo macluumaadka aad u soo gudbiso Waaxda Wadaxiriirka Shirkadaha ama Xiriirka Maalgashadaha si markaa kuwa loo oggolaaday inay si guud ugu hadlaan magaca Shirkadda ay wax uga qaban karaan codsiga.
- **Hadal.** Haddii aadan hubin waxa ay tahay inaad sheegto iyo sida ay tahay inaad u sheegto, la xiriir kooxda Wadaxiriirka Ganacsi ee Shirkadda si aad u ogaato waxa aad sheegi karto iyo waxa aadan sheegi karin, iyo sida aad u hubin karto inaad si xirfad leh u sheegto wax aad sheegayso.

## SU'AAL KU SAABSAN XAALAD DHAB AH

**S** **Waxaan qoraal ku saabsan Hormel Foods oo aan ogahay inuusan run ahayn ku arkay bog ganacsi. Waxaan rabaa inaan mareegta soo dhigo war saxayo warka qoraalka beenta ah. Tani ma sameyn karaa?**

**J** Maya. Waad ku saxsan tahay inaad dhahdo xogtani khaladka ah waxay u baahan tahay in la saxo, laakiin beddelkii aad adigu jawaab ka soo bixin lahayd, arrinta u gudbi kooxda wadaxiriirka Shirkadda. Xubnaha kooxda ee loo idmay inay ku hadlaan magaca Shirkadda ayaa dabagal ku sameyn doona si ay war saxayo qoraalka beenta ah u soo dhigaan bogga.

# U-HEELANAANTAYADA MUWAADINNIMADA SHIRKADEED EE MAS'UULKA AH

**Ka soo bixidayada mas'uuliyadahayaga haddii aanu nahay muwaadiniinta shirkadeed ee dunida ayaa saamayn dhab ah oo fiican ku leh bay'ada dabiiciga ah, bulshooyinkayaga iyo sida aan dunida uga samayno ganacsi. Waxaa naga go'an inaan qaadano kaalintayada si aan dunida uga dhigno meel ka wanaagsan sidii hore.**

## Kaqaybgalka Ganacsiga Caalamiga ah

Sharciyada ganacsiga caalamiga ahi waxay sheegayaan halka, sida iyo cidda aan ganacsi kula sameyn karno daafaha dunida. Sharciyadaan waxaa ka mid ah furdooyinka, xakameynta alaabta la soo dejiyo, xakameynta alaabta la dhoofiyo, sharciyada kahortagga qaadacaada, cunaqabataynta iyo xayiraadaha ganacsi. Ku xadgudubka sharciyada wxaa ka dhalan karaa ciqaab madani ah iyo mid dembiyeed oo weyn. Raacida xeerarkan waxay inoo oggolaanaysaa inaan u hoggaansanno sharciga iyo inaan hubinno in Shirkaddayadu aysan la kulmin ciqaab ama cunaqabataynta. Si fudud haddii loo dhigo, waa waxa saxda ah ee ay tahay in la sameeyo.

### WAXA UU KA DHIGAN YAHAY

#### Furdooyinka, xakameynta alaabta la soo dejiyo

waxay xukumaan badeecadaha la soo gelinayo waddanka, oo ay ku jiraan kala-soocida badeecadaha, aqoonsiga saxda ah ee waddanka lagu soo sameeyay badeecadaha, soo-gudbinta iyo haynta habboon ee dukumentiyada loo baahan yahay, iyo bixinta lacagaha waajibka ah, canshuuraha iyo khidmadaha.

#### Xakamenta alaabta la dhoofiyo

waa xeerar u mamnuucaya dhoofinta aan sharciyeysnayn ee badeecadaha qaarkood ama macluumaadka sababo la xiriira amniga qaran ama ilaalinta ganacsiga.

#### Sharciyada kahortagga qaadacaada

waa sharciyo Maraykan oo mamnuucaya ama ciqaabaya dhaqanada taageeraya qaadacaadyada dhaqaale ee caalamiga ah qaarkood. Sharciyada waxay kahortaagayaan in shirkadaha Maraykanka loo adeegsado fulinta siyaasado shisheeye oo ay waddamo kale leeyihiin kuwaasoo ka hor imanaya siyaasadaha Mareykanka.

#### Cunaqabataynta iyo xayiraadaha ganacsiga

waa ganaaxyo ganacsi iyo kuwa maaliyadeed ama mamnuucyo ganacsi oo ay dowlad ku soo rogtay dalal kale, dad iyo shirkado, iyada oo ku saleyneyso siyaasadda arrimaha dibadda iyo walaacyada amniga qaran. Cunaqabataynta dhaqaale waxay mamnuucaysaa macaamil ganacsi oo kala duwan oo lala yeesho hay'adaha la beegsanayo. Ganaaxyadaan ayaa laga yaabaa inaan loo soo rogin sababo dhaqaale awgood. Waxaa laga yaabaa in loo soo rogo sababo siyaasadeed, kuwo militari iyo kuwa bulsheed oo kala duwan awgood.

## Samee Waxa Saxda ah

- **U hoggaansan dhammaan sharciyada ganacsiga caalamiga ah ee khuseeya ganacsigayaga.** Haddii aad ka shaqayso hawlgallada caalamiga ah, ama la shaqeyso waaxda soo iibinta ama iibka ka baxsan Maraykanka, waa inaad taqaanaa aadna raacdaa xeerarka khuseeya shaqadaada iyo dhaqdhaqaaqa badeecadaha ka gudbayo xuduudaha.
- **Ixtiraam sharciyada ganacsiga caalamiga ah.** Mararka qaarkood waxaa laga yaabaa inaysan caddayn sharciyada iyo dhaqammada khuseeya isweydaarsi ganacsi oo khaas ah oo caalami ah. Haddii aad qabtid su'aalo, aadan hubin waxa xiga ee ay tahay inaad sameyso, ama aad aaminsan tahay in silsiladda qaybinta saadka ama shuraakada ganacsi ee alaab-qaybinta uu ku xadgudbayo sharciga ganacsiga, isla markiiba la xiriir Waaxda Anshaxa iyo U-hoggaansanaanta ama Waaxda Sharciga.
- **Dhowr cunaqabataynada dowladda.** Ha la sameynin ganacsi dalal, dad ama hay'ado la saaray xayiraad ganacsi ama cunaqabateyn dhaqaale. Marnaba ha kaqaybgelin hana ku kicin qaadacaaddo aanay dowladda Maraykanku taageerin.
- **La soco dhinacyada saddexaad ee shurakadayada ah.** Silsiladda qaybinta saadka ee gudaha iyo dibadda iyo dhinacyada saddexaad ee shurakadayada ah waa inay sidoo kale u hoggaansamaan sharciyada. Haddii ay ku xadgudbaan sharciyada ganacsiga, Shirkaddayadu ayaa laga yaabaa in lagala xisaabtamo. Mar haddii aad la hawlgasho dhinac saddexaad, si taxaddar leh ula soco oo had iyo jeer u fiirso wax kasta oo muujin kara dhaqan sharci-darro ah ama anshax xumo ah.
- **Hadal.** Haddii aad qabtid su'aalo, aadan hubin waxa xiga ee ay tahay inaad sameyso ama aad aaminsan tahay in dhinac saddexaad oo shurakadayada ganacsi ah ay ku xadgudbayaan sharciga ganacsiga, isla markiiba la xiriir Waaxda Anshaxa iyo U-hoggaansanaanta ama Waaxda Sharciga

### SU'AAL KU SAABSAN XAALAD DHAB AH

**S** **Qof macmiil u noqon kara Hormel Foods mustaqbalka ayaa jooga waddan ay saaran tahay cunaqabatayn dhaqaale. In si toos ah alaabta loogu doofiyo macmiilka waxay u badan tahay inay keenayso dib-u-dhac inta la raadinayo oggolaanshaha Shirkadda ee gudaha ah lana sugayo in mas'uuliyiinta dowladda ay ka oggolaadaan dhoofinta alaabta. Ma u diri karnaa agabyo dhic saddexaad oo joogo waddan aan cunaqabatayntaan soo rogin si looga fogaado dib-u-dhaca?**

**J** Maya. U-dhoofinta badeecadaha bar dhammaad dhexe si loo dhinac maro xeerarka xukuma ganacsiga caalamiga ah waa mamnuuc. La xiriir Waaxda Sharciga ee Hormel Foods si aad ugala Hadasho walaacyadaada ama su'aalahaaga. Marka la helo oggolaansho sax ah – keliya marka la helo oggolaansho sax ah - ayaa laga yaabaa in Hormel Foods ay awood u yeelato inay taageerto macmiil ku sugan waddan lagu soo rogay cunaqabateyta dhaqaale ee Mareykanka.

# Diidida Musuqmaasuqa iyo Laaluushka

Haddii aanu nahay Hormel Foods, waxaa naga go'an inaan si daacad ah oo daacadnimo ku jirto u qabanno shaqadayada, oo aanan marnaba laaluush ama dhaqammo kale oo musuqmaasuq ah samaynin. Bixinta ama aqbalidda laaluush ama lacag-bixin kale oo aan habboonayn waxay xadgudub ku tahay siyaasadahayaga iyo sharciyada aan ku ganacsanno. Waxaa muhiim ah in laga fogaado in xitaa go'aamadayada ganacsi ay ka muuqdaan saameynta lacag-bixin aan habboonayn ama nooc kasta oo musuqmaasuq ah.

## WAXA UU KA DHIGAN YAHAY

### Laaluushka

waa wax kasta oo qiimo leh oo loo bixiyo inuu saamayn ku yeesho go'aannada qof ka tirsan dowladda ama shirkadaha gaarka loo leeyahay si loo helo faa'iido ganacsi, mid maaliyadeed, mid sharciyeyn ama dhaqaalo. Laaluushku had iyo jeer ma ahan lacag caddaan ah. Hadiyad, adeegyo xirfadeed, safar, madadaalo ama xitaa shaqo-bixin ayaa loo arki karaa inay yihiin laaluush.

### Bixinta lacagta fududeynta,

ama "bixinta lacagta meel-marinta" sida caadiga ah waa lacag yar oo la siiyo sarkaal dowladeed oo heerkiisu hooseeyo taasoo loogu talagalay in lagu dhiirrigeliyo ama lagu dardargeliyo qabashada hawl joogto ah ama qaadista ficil lagama maarmaan ah oo ka mid ah shaqada sarkaalka. Tusaalooyinka ficiladaan waxaa ka mid ah adeegga boostada, helida laysinada ama ruqsadaha, ama ka shaqaynta dukumiintiyada dowladda sida fiisooyinka. Sharciyo badan ayaa tani u tixgeliya inay tahay nooc ka mid ah lacag-bixin mamnuuc ah, oo aan habboonayn.

### Sarkaalka dowladda

waa qof kasta oo u shaqeeya ama wakiil ka ah wakaalad ay dowladdu leedahay ama ay dowladdu gacanta ku hayso. Kuwani waxaa ka mid ah mas'uuliyiinta la doortay iyo kuwa la magacaabay heer kasta oo ay kaga jiraan dowladda, iyo sidoo kale mas'uuliyiinta xisbiyada siyaasadeed iyo musharraxiinta isku soo sharaxay xilka. Saraakiisha dowladda ayaa sidoo kale noqon kara shaqsiyaadka ku jira boqortooyada, sida amiirka.

# Samee Waxa Saxda ah

- **Raac sharciga iyo siyaasadahayaga.** Xeerka Dhaqmada Shisheeye ee Musuqmaasuqa ee Maraykanka (FCPA), Sharciga Laaluushka ee UK iyo sharciyada la-dagaallanka musuqmaasuqa ee la midka ah ayaa ah kuwa caalami ah waxayna si gaar ah ula xiriiraan laaluushka la siiyo shaqaalaha ama saraakiisha dowladda. Waa in sharciyadaan mar walba la raaco. Ha bixinin hana qaadan laaluush ama nooc kasta oo kale oo ah lacag-bixin aan habboonayn ah.
- **La soco dhinacyada saddexaad ee shurakadayada ah.** Inaga ayaa mas'uul ka ah falalka kooxaha kale ee na matalaya, oo ay ku jiraan wakiilada, qaybiyayaasha, la-taliyayaasha iyo dullaalada iyo wakiilada kale. Haddii aad la shaqeyneyso mid ka mid ah kooxahaan kale, si taxaddar leh ula soco. Ka digtoonow qof kasta oo ganacsi ku samaynaya magaca Shirkadda oo laga yaabo inuu caan ku yahay dhaqammo ganacsi oo shaki laga qaba. Haddii ay lagama maarmaan tahay in la isticmaalo dhinac saddexaad oo noocan ah, si dhow ula soco tallaabooyinka shaqsiga ama shirkadda.
- **Hubi in buugaagta iyo diiwaanadu ay sax yihiin.** Xisaabaad iyo diiwaano maaliyadeed oo run ah ayaa muhiim u ah in si cad loo qeexo loona diiwaangeliyo nooc kasta oo lacag-bixin ah.
- **Ka Hadal musuqmaasuqa.** Soo sheeg arrinta haddii lagaa codsado bixinta lacag fududeyn ah ama laaluush, haddii aad ogaato dhaqan kasta oo kale oo noqon kara musuqmaasuq ama haddii aad qabtid su'aal ku saabsan musuqmaasuq dhici kara. Islamarkiiba la xiriir kormeerahaaga, Waaxdayada Sharciga ama Sarkaalka ah Madaxa U-hoggaansanaanta. Waxaad sidoo kale si qarsoodi ah ugu soo sheegi kartaa Khadka Tooska ah ee Anshaxa iyo U-hoggaansanaanta.



## SU'AAL KU SAABSAN XAALAD DHAB AH

**S** **Waxaan ka shaqeynayaa sidii la iigu ansixin lahaa ruqsadda dhisida xarun cusub oo laga dhisayo suuq ku cusub Hormel Foods. Sarkaalka ruqsadda ansixiyo ee deegaanka aad ayuu uga gaabiyay wax ka qabashada codsigayga wuxuuna mar kasta oo aan wacay ii muujiyay in waxoogaa lacag caddaan ah oo aan hoosta ka siiyo ay soo dadajin doonto ruqsadda. Waxaan haysanaa waqti kama dambeys ah oo aanan rabin inaan ka dib-dhacno, waxaana ka baqayaa inaan seegno yoolashayada haddii aan sii sugno. Ma siin karaa in yar oo lacag ah?**

**J** Maya. Tani ma ahan xalka saxda ah. Badanaa in arrinta aad u gudbiso madaxa sarkaalka ayaa xallin doonta dhibaatada. Haddii kale, la xiriir Waaxdayada Sharciga si aad ugala hadasho xulashooyin kale.

DHIGAALADA

## Si Aad Wax Dheeraad ah U Ogaato

- Siyaasadda La-dagaalanka Musuqmaasuqa ee Hormel Foods Corporation
- Habraaca Hannaanka Baaritaanka Dhinacyada Saddexaad ee Hormel Foods Corporation



OGOW

# TUSAALOOYINKA HAWLAHA LA MAMNUUCAY

- **Khiyaanada.** Daacad-darrada ama khiyaanada nooc kasta oo ay tahayba, sida siinta gunnooyin ama dallacaadaha iibka dhinacyada kale ee hawlo shaki ku jira ama aan caddayn.
- **Ka leexashada sharciga.** Hawlaha loogu talagalay in lagu dhinac maro sharciyada ku saabsan lacag ka haysashada ama lacag siinta wakiilada ama la-taliyayaasha.
- **Been-abuurka.** In shay been-abuur ah ama qorraalo macmal ah oo lagu qoro xisaabaadka iyo diiwaanada Shirkadda.
- **Bixinta lacagta fududeynta.** Kuwaan lagama oggola waddamada qaar ee aan ka ganacsanno. Sidaas darteed, inaga iyo kuwa nala shaqeeyo waa inaan marnaba bixin lacag noocan ah inagoo matalayno Shirkadda iyadoo aan horay loo helin oggolaansho qoraal ah oo uu bixiyay Sarkaalka Sare ee Maaliyadda, La-taliyaha Guud ama wakiilkiisa/keeda.
- **Bixinta lacag caddaan ah.** Bixinta lacag caddaan ah, marka laga reebo qiyaasyada macquulka ah ee laga bixiyo koontada lacagta caddaanka ah ee la aasaasay si habboona loo diiwaangeliyey ee loogu talagalay baahiyada ganacsi ee sharciga iyo kuwa caadiga ah.
- **Jeeggaga lagu bixin karo lacag caddaan ah ama la siin karo cida haysato.** Ka-reebitaano ayaa la samayn doonaa keliya marka oggolaansho hore oo qoraal ah laga helo Sarkaalka Sare ee Maaliyadda ama wakiilkiisa.
- **Safarrada kharashkooda la bixiyo oo dhan.** Bixinta khidmadda diyaaradda, hudheelka, cuntada iyo kharashaadka kale ee la xiriira safarka, la bixiyo ama la aqbalo.

# Aqbalida Mas'uuliyadda Bay'adeed

Waxaan ku dhiiranahay inaan kaalintayada ka qaadno sidii aan bulshooyinkayaga iyo adduunkayaga u wanaajin lahayn inagoo noqoneyno kuwo daryeelo bay'ada dabiiciga ah. U-heelanaantayada ilaalinta khayraadka dabiiciga ah inagoo yareyneyna gaaska lagu siidaayo hawada, keydineyno biyaha, isla markaana yareyneyno isticmaalka tamarta aan la cusbooneysiin karin iyo qashinka adag ayaan mudnaanta siinaa marka aan ku gudajirno hawlgaladayada meel kasta oo aan ganacsi ka sameyno. Waxaan filaynaa in isla u-heelanaantan ay ku fidi doonto silsiladdayada qaybinta saadka iyo dhinacyada saddexaad ee shurakadayada ganacsi ah.

## Samee Waxa Saxda ah

- **Qiimee bay'ada.** Kaalintaada ka qaado ilaalinta bay'ada dabiiciga ah una daryeel si taxaddar leh. Raac dhammaan sharciyada bay'ada ee khuseeya iyo siyaasadaha Shirkadda ee khuseeya shaqadaada, meel kasta oo aan ganacsi ka samayneynaba. Dhammaanteen waxaan u baahannahay inaan kaalinteenna ka qaadanno ilaalinta bay'adayada dabiiciga ah.
- **U fiirso khataraha bay'ada.** Kuwaan waa dhaqano halis ah sida qashin-qubka aan habboonayn ama siideynta sunta, waana in la soo sheego.
- **Xaqiiji in warbixinada ay yihiin kuwo sax ah oo dhammaystiran.** Tani waxay si gaar ah muhiim ugu tahay hababka saamayn kara bay'ada, sida cabbirida, qorista ama ka soo warbixinta dareeraha wasakhda ah iyo qiiqa lagu siidaayo bay'ada, ama maaraynta qashinka halista ah.
- **Ka digtoonow dhaqamada kooxaha kale ee nala shaqeeyo.** La soco tallaabo kasta oo ay qaadaan shurakada ganacsi oo laga yaabo inay ku xadgudbayso miqyaasyada Shirkadda ee ilaalinta bay'ada. Dhinacyada saddexaad ee shurakadayada ah waxay qayb ka yihiin Shirkaddayada marka ay matalayaan Shirkadda, sidaas darteed dhaqamadooda waa inay la jaanqaadaan miqyaasyadayada.
- **Hadal.** Soo sheeg wixii shaki kaa galo ama aad ogtahay oo ku saabsan ku xadgudubka sharciyada bay'ada iyo siyaasadaha ee ka jira hawlgaladayada ama ka jira hawlaha shuraakadayada ganacsi, adigoo adeegsanaya mid ka mid ah noocyada ka warbixinta ee ku jira Xeerkan.

## SU'AAL KU SAABSAN XAALAD DHAB AH

**S** **Waxaan leenahay hannaan wax-soo-saar oo adeegsanaya weelal yaryar oo badan oo ka kooban maado cayriin ah oo aan dib loo warshadeyn karin. Muddo sanado ah, waxaan arkayay tiro badan oo ka mid ah weelashaan oo la tuurayo. Waxaan weydiiyay kormeerahayga in maadadan lagu keeni karo weelal waaweyn, laakiin wuxuu ii sheegay inuusan u malaynaynin inay suurtagal tahay. Wali waxaan ka walaacsanahay weelashan la tuurayo oo qashinka noqonayo. Ma jiraan wax intaas ka badan oo aan samayn karo?**

**J** Dabagalka arrintu ayaa gabi ahaanba ah waxa saxda ah ee ay tahay in la sameeyo. Xubin kasta oo ka tirsan kooxda ayay mas'uuliyad ka saaran tahay in la raadiyo siyaabo aan si fiican ugu ilaalin karno bay'ada. Baakadaynta agabka wax-soo-saarka ayaa isbeddeli kara waqti kadib, waxaana laga yaabaa in baakado waaweyn hadda la heli kara. Fadlan walaacaaga kala xiriir Agaasimaha Joogtaynta Bay'ada si arrinta weelka la tuurayo loo baaro waxaana rajeeyneynaa in la xaliyo.

DHIGAALADA

## Si Aad Wax Dheeraad ah U Ogaato

- Warbixinta Mas'uuliyada Shirkadeed ee Hormel Foods - Bayaanka Siyaasadda Bay'ada
- Siyaasadda Bay'ada ee Hormel Foods
- Mabaadi'da Mas'uuliyadda Alaab-qeybiyaha ee Hormel Foods
- Siyaasadda Beeraha La Joogteyn Karo ee Hormel Foods



# Difaacida Xuquuqda Aadanaha

Waxaan nahay dad aad u difaaca xuquuqda aadanaha. Shirkadda Hormel Foods waxaa ka go'an inay hormariso ayna ilaaliso xuquuqahaan aasaasiga ah inta lagu gudajiro hawlgaladayada iyo silsiladdayada qaybinta saadka. Xadgudub kasta oo xuquuqda aadanaha ah looma dulqaadan doono meel kasta oo laga joogo shirkadayada ama ha haado mid ka dhaco gudaha hawlaha shurakadayada ganacsi.


## Samee Waxa Saxda ah

- **Xushmee xuquuqda aadanaha.** Tani waxay ka bilaabataa sida aan iskula dhaqano iyo sida aan ula dhaqano shurakadayada ganacsi. Waxaa ka mid ah in la raaco sharciyada mamnuucaya shaqada khasabka ah, ku shaqaynta carruurta, takoorka shaqada iyo ka ganacsiga dadka. Kaalintaada ka qaado hormarinta ka mid noqoshada iyo kala duwanaanshaha adiga oo dhowr xuquuqda iyo ixtiraamka qof kasta oo aad la shaqayso.
- **La soco dhinacyada saddexaad ee shurakadayada ah.** Ka digtoonow wixii ah ficil ay geystaan shurakada ganacsi ee laga yaabo inuu ku xadgudbo miqyaasyada Shirkadda ee ilaalinta xuquuqda aadanaha. Dhinacyada saddexaad ee shurakadayada ah waxay qayb ka yihiin Shirkaddayada marka ay matalayaan Shirkadda, sidaas darteed dhaqamadooda waa inay la jaanqaadaan miqyaasyadayada.
- **Hadal.** Soo sheeg wixii shaki kaa galo ama caddaynta ku xadgudubka xuquuqda aadanaha, ama ku xadgudubka sharciyada iyo siyaasadaha la xiriira ee ka jira hawlgaladayada ama ka jira hawlaha shuraakadayada ganacsi adigoo adeegsanaya mid ka mid ah noocyada ka warbixinta Xeerkan..

## SU'AAL KU SAABSAN XAALAD DHAB AH

**S** **Waxaan booqday mid ka mid ah alaab-qeybiyeyaashayada si aan u sameeyo qiimeyn tayo. Intii aan goobta joogay, waxaan arkay dhowr shaqaale oo aad u da' yar. Waxaan weydiiyay alaab-qeybiyaha inay yihiin kuwo da'da shaqo gaaray, laakiin ma aanan helin jawaab cad. Maxaan sameeyaa hadda?**

**J** Waxaad samaysay waxa saxda ah markaad weydiisay alaab-qeybiyaha. Si kastaba ha ahaatee, arrintu waxay weli u baahan tahay in la baaro. Waa inaad soo sheegtaa arrinta adigoo la xiriiraya kormeerahaaga ama il kale oo Shirkadeed. Haddii la xaqiijiyo adeegsiga shaqaalaha aan qaangaarin, waxaan ka codsan doonaa alaab-qeybiyaha inuu beddelo dhaqankan. Haddii uu sidaas sameyn waayo, waxaan goyn doonaa xiriirka Shirkadda ay la leedahay alaab-qeybiyaha.



DHIGAALADA

## Si Aad Wax Dheeraad ah U Ogaato

- Warbixinta Mas'uuliyadda Shirkadeed ee Hormel Foods
- Siyaasadda Xuquuqda Aadanaha

# Ku Lug Lahaanshaha Hawlaha Siyaasadeed

Waxaan ixtiraamnaa xaqa ay xubnaha kooxdu u leeyihiin inay ku lug lahaadaan hawlaha siyaasadeed si ay u taageeraan xisbiyada siyaasadeed, kooxaha, murashaxiinta ah ama saraakiisha dowladda. Markaad ku hawlan tahay hawlahan, waa inay caddahay inaad u dhaqmeyso si madaxbannaan oo aadan wakiil ka ahayn Shirkadda.

## Samee Waxa Saxda ah

- **Raac sharciyada iyo siyaasadaha Shirkadda.** Meel kasta oo aan ganacsi ka samayno, doorka Shirkadda ee hawlaha siyaasada iyo maalgelinta hawlaha siyaasada waxaa xaddidaya sharciyada iyo xeerarka. Kooxdayada Arrimaha Sharci-dejintu ayaa xaqiijineysa in ra'yiga Shirkadda la maqlo marka ay saraakiisha dowladda gaarayaan go'aamada muhiimka ah. Kaqaybgalka hawlaha siyaasadeed ee shirkaddu waa inuu ahaadaa mid habboon, u hoggaansamaya sharciyada khuseeya uuna ansixiyaa Madaxweyne Ku-xigeenka Arrimaha Sharci-dejinta.
- **Hantida iyo lacagaha shirkadda.** Marnaba hantida ama lacagaha Shirkadda ha u isticmaalin inaad ugu tabarucdo hawl siyaasadeed adigoo matalayo Shirkadda.
- **Ha ku lug yeelan ololayn.** Qofna looma oggola inuu kaqaybqaato hawlaha u doodidda siyaasadeed ama u ololayn isagoo matalayo Shirkadda. Danaha Hormel Foods ee ku saabsan arrimaha sharci-dejinta, sharciyeynta iyo siyaasadda waxaa loo sheegaa xildhibaannada iyadoo loo marayo Madaxweyne Ku-xigeenka Arrimaha Sharci-dejinta iyo/ama guddiga tallaabada siyaasadeed ee loo xilsaaray (PAC).
- **Hadal.** Haddii aad qabtid su'aalo ama walaacyo ku saabsan hawlaha siyaasadeed ama tabarucaadka, daalaco dhigaal ku qoran Xeerkan si aad uga hesho hagid.



OGOW

### ADIGA IS-MATAL

Adiga is-matal marka aad ku hawlan tahay hawlo siyaasadeed. Waa tan sida loo sameeyo.

- **Marnaba wakhtiga shaqada ha u isticmaalin hawlahaaga siyaasadeed ee gaarka kuu ah.** Hawlahaan waa inay ahaadaan kuwo ikhtiyaari ah aadna qabsataa wakhtiga aadan shaqada ku jirin, adigoo isticmaalayo lacagaha shakhsiyeed. Marnaba ha dalban tabarucaad siyaasadeed hana qaybin agabyo inta lagu jiro saacadaha shaqada. Waxaan ku dhiirigelineynaa xubnaha kooxda inay kaqeybqaataan geedi-socodka dimuqraadiyadda oo ay codeeyaan. Si kastaba ha ahaatee, haddii aadan codayn karin saacadaha aadan shaqada ku jirin oo aad u baahan tahay inaad ka codeyso doorashada waqtiga shaqada, la xiriir kormeerahaaga.
- **U hadal shakhsi ahaan.** Cadee in erayadaada iyo fikradahaagu siyaasadeed ay yihiin kuwaaga oo aysan ahayn kuwa matalayo Shirkadda.
- **Kaqaybgal siyaasada adigoo muwaadin madax-bannaan ah.** Xubnaha kooxda waxaa loo oggol yahay inay tabarucaad shaqsiyeed u sameeyaan musharrixiinta iyo xisbiyada siyaasadeed ee ay doorbidayaan.

### SU'AAL KU SAABSAN XAALAD DHAB AH

**S** **Musharrax jaga uga sharaxan doorasho maxalli ah ayaa codsanayso in xaruntayada ay amaahan karto baabuur tareelo ah oo ay leedahay Hormel Foods si ay ugu adeegsato masrax ahaan xaflad u ololeyn doorasho oo ay banaanka ku qabanayso. Ma amaahin karaa?**

**J** Maya, ma amaahin kartid. Tabarucaada maaliyadeed ama tabarucaadaha la midka ah ama wax kasta oo kale oo qiimo leh oo la siiyo musharrax siyaasadeed, xitaa haddii ay tahay mid aad u qiimo yar, ayaa laga yaabaa inay u horseedo Shirkadda inay u hoggaansanto sharciyada maaliyadda ololeynta siyaasadeed ee deegaanka, gobolka iyo federaalka iyo waajibaadyada warbixinta. Codsi kasta oo ka imaanaya musharrax siyaasadeed ama sarkaal la soo doortay oo ah inuu isticmaalo hantida ama lacagaha Shirkadda qiyaas kasta oo ay tahayba waa inuu horay u ansixiyaa Madaxweyne Ku-xigeenka Arrimaha Sharci-dejinta.

# U Adeegida Bulshooyinkayaga

Waxaan si xoogan u aaminsanahay inaan gelino waqti, hibo iyo hanti si aan u taageerno bulshooyinkayaga caalamka ku kala sugan. Waxaan ku dadaalladeena samafal ee ku aadan gaajada, waxbarashada iyo taageerida deegaanada aan ka ganacsano. Shirkadda Hormel Foods waxay nagu dhiirrigelinaysaa dhammaanteen inaan ku lug lahaano bulshooyinkayaga oo aan kaqaybqaadano dhacdooyinka ay Shirkadda maalgeliso ee taageera dadka kale.

## Samee Waxa Saxda ah

- **Inoo matal si sharaf leh.** Markaad tabarucdo waqtigaaga ama aad lacag ugu deeqdo hawl bulsho adigoo matalayo Shirkadda, muuji xirfad, xushmad iyo ixtiraam.
- **Qaad tallaabo shaqsiyeed bulshadaada dhexdeeda.** Waxaad u banaan bixi kartaa xuquuqda aadanaha, kaqaybqaadan kartaa dhacdooyinka dib-u-warshadaynta, ku deeqi kartaa dadaallada wax looga qabanayo gaajada waxaadna kaqaybgali kartaa hawlaha kale oo taageera bulshada firfircoon. Si kastaba ha noqotee, marnaba ha ku cadaadin dadka kale inay ka qaybqaataan ama siiyaan deeq hay'adaha samafalka bulshada ama hadafyada aad doorbido.
- **Ha bixin tabarucaad samafal ah adigoo matalayo Hormel Foods.** Laga bilaabo lacagta caddaanka ah ilaa deeqaha badeecado iyo deeqaha waxbarasho, wax bixinta samafalka ah waxaa abaabula Waaxda Wadaxiriirka Shirkadda. Maareeyayaasha warshaduhu waxay leeyihiin xoogaa ikhtiyaar ah oo ah inay ku deeqaan tabarucyo aan laga abaabulin heerka shirkadeed.
- **Ka taxaddar iska hor imaadka danaha.** Xaqiiji in kaqaybgalkaaga madaniga ah, sida kaqaybgalka guddi bulsheed oo lagaa doonayo tabarucida saacado badan oo waqtigaaga ah, uusan ka hor imaaneyn waajibaadkaaga shaqo ama danaha Shirkadda.

## SU'AAL KU SAABSAN XAALAD DHAB AH


**S** **Gabadhaydu waxay xubin ka tahay barnaamij dhallinyaro, waxayna sannad walba jeceshahay inay iibiso buskudyo iyadoo lacag ugu uruurineyso shirkadda. Xubnaha kooxda ee aan la shaqeeyo ayaa had iyo jeer i weydiiyaan goorta xigta ee iibinta buskudka ay bilaaban doonto, maxaa yeelay waxay rabaan inay iibsadaan noocyada ay jecel yihiin. Marka buskudka la heli karo, xaanshida dalabka ma uga tagi karaa qolka nasashada si ay u eegaan shaqaalaha ila shaqeeya?**

**J** Haa, tani waa caadi. Lacag ururiyayaasha bulshada ee hadafyada sida barnaamijka dhalinyarada ee qeybinta buskudka waa la oggolyahay haddiiba aadan qofna ku cadaadineynin inuu iibsado buskudka.

DHIGAALADA

## Si Aad Wax Dheeraad ah U Ogaato

- Warbixinta Mas'uuliyadda Shirkadeed ee Hormel Foods



# Sookoobista Dhigaalada

Xeerkayagu ma dabooli karo xaalad kasta oo laga yaabo inaad la kulanto inta aad ka shaqaynayso Hormel Foods. Haddii Xeerku uusan bixineynin hagis kugu filan oo ku saabsan arrin khaas ah oo aadan hubin waxa saxda ah ee ay tahay inaad sameeyso ama aad qabto walaac, la tasho kormeerahaaga ama mid ka mid ah ilahaan kale si aad caawimaad uga hesho.

- Waaxda Anshaxa iyo U-hoggaansanaanta – **EthicsandCompliance@hormel.com**
- Waaxda Sharciga – **LawDepartment@hormel.com**
- Waaxda Shaqaalaha (Maraykanka) – **HumanResources@hormel.com**
- Waaxda Shaqaalaha (Shiinaha) – **HumanResources@hormel.com.cn**
- Waaxda Shaqaalaha (Baraasiil) – **RecursosHumanos@ceratti.com.br**
- Waaxda Hanti-dhowrka Gudaha – **InternalAudit@hormel.com**
- Waaxda Wadaxiriirka Shirkadda – **Corporate_Communications@hormel.com**

## SIDA LOO HELO KHADKA TOOSKA AH EE ANSHAXA IYO U-HOGGAANSANAANTA EE HORMEL FOODS

- U isticmaal mareegta si qarsoodi ah: **https://hormelfoods.ethicspoint.com.**
- Gudaha Maraykanka iyo Kanada, wac Khadka Tooska ah ee Anshaxa iyo U-hoggaansanaanta: 1-833-672-1232.
  - Gudaha dalka Shiinaha, wac: 400-120-0204.
  - Gudaha dalka Baraasiil, wac: 0800-000-0092.
  - Dibadda Maraykanka, Kanada, Shiinaha iyo Baraasiil, wac adoo adeegsanayo furaha lambar ee waddankaaga, kaasoo laga heli karo: **www.business.ATT.com/collateral/access.html.**
  - Markaad wacdo furaha lambar ee waddankaaga, waxaa lagu weydiin doonaa lambarka khadka tooska ah ee Maraykanka. Kadibna waxaa lagugu xiriirin doontaa Takhasusle Wadaxiriir oo ku hadlo afkaaga hooyo.
- Dhammaan wicitaanada ayaa laga dhigi karaa kuwo qarsoodi ah.
- Dhammaan xiriirada iyo warbixinada waxaa loo maareyn doonaa si qarsoodi ah ilaa iyo inta suurtagal ah.